JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند

| | | |
|---|---|---|
| *Sannadka 5aad* | *Cadad Gaar ah* | *22/06/2016* |

# DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND

Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2016*

# REPUBLIC OF SOMALILAND

# THE PRESIDENT

REF: JSL/M/DEC/222-0129/72001 DATE: 22 Rabe'Al Awal 1422H
14 June 2001

## DECREETO MADAXWEYNE NO: 129/72001

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu arkay: Qodobka 130aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland oo qeexaya in ku dhaqankiisu ka bilaabmayo ka dib ansixinta natiijada Aftida Dastuurka.

Markuu arkay: Go'aanka MS/GMS/G-7/134/2001 ee Maxkamadda Sare ee Jamhuuriyadda Somaliland ku ansixisay natiijada Aftida Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland ee ku meel gaadhka ahaa.

Markuu tixgeliyey: Qodobka 47aad xubintiisa 1aad ee Xeer No: 16/2000 ee 12/11/2000 oo awood u siinaya soo saarida xeerkan.

**Wuxuu**

Soo saarayaa xeerkan oo lagu faafinayo dhaqangalka Dastuurka Jamhuuriyadda

Somaliland, waxaana lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah ee dawladda.

Allaa Mahad Leh,

Maxamed Ibraahim Cigaal
Madaxweyne

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND
# BAARLAMAANKA

7 May 2000
REF: GB/01/4/5/2000

**Ku: -** **Maxamed Ibraahim Cigaal**
**Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland**

Mudane Madaxweyne,

Waxaanu si xushmad iyo qadarini ku dheehan tahay halkan kuugu soo gudbinaynaa (5) Shan nuqul ee Dastuurka Qaranka oo ay Golayaasha Baarlamaanku in muddo ah ku hawlanaayeen wax-ka-beddelkiisa ama/iyo kaabiddiisa sidii uu tilmaamayay qodobkii 153aad ee Dastuurkii qabyada ahaa.

Waxaanu ku rajoweynahay in ay xukuumaddu ka hawlgasho daabacaadda iyo faafinta Dastuurka.

ALLAA MAHAD LEH

Axmed Maxamed Aadan (Qaybe)
Guddoomiyaha Golaha Wakiilalada

Sh. Ibraahim Sh. Yuusuf Sh. Madar
Gudoomiyaha Golaha Guurtida

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**
**MAXKAMADDA SARE**

22 Rabe'Al Awal 1422H
14 June 2001

Ref: MS/GMS/

Ku: Madaxweynaha
Jamhuuriyadda Somaliland
Hargeysa

Ujeedo: Gudbinta nuqulka natiijadii ka soo baxay codbixintii aftidii loo qaaday Dartuurka JSL.

Mudane Madaxweyne,

Iyada oo xishmad weyni ku ladhan tahay, ayaan anigoo ku faraxsan halkan kuugu soo lifaaqay nuqulkii qaraarkii Maxkamadda Sare ee 13/06/2001 ee ay ku ansixisay uguna dhawaaqday natiijadii kama dambaysta ahayd ee codbixintii aftidii Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland iyo lifaaqyo la xidhiidha.

Allaa Mahad Leh

(Cismaan Xuseen Khayre)
Madaxa Maxkamadda Sare
Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND
# MAXKAMADDA SARE

MS/GMS/G-7/134/2001 — 21 Rabe'Al Awal 1422H
13/06/2001

UJEEDDO: Qaraarka ansixinta iyo ku dhawaaqidda <u>Natiijada Codbixinta Dastuurka JSL.</u>

**<u>MAXKAMADDU:</u>**

MARKAY ARAGTAY: Qod. 125 ee Dastuurka ku meel gaadhka JSL oo jidaynaya soo saaridda Xeer suurta gelinaya in afti loo qaado.

MARKAY ARAGKAY: Qod. 130 ee isla Dastuurka oo qeexaya in ku dhaqankiisu ka bilaabmayo, kadib ansixinta natiijada aftida loo qaadayo.

MARKAY ARAGTAY: Nuqulada Diiwaanada ku kala xusan Qod. 40aad xubintiisa (4) aad iyo Qod. 42 aad xubintiisa (3) aad ee xeerka aftida dastuurka No. 16/2000 ee 12/11/2000 wax cabashooyin ahna la soo gaadhsiin.

MARKAY SI DHAB AH: uga baaran degtay, xaqiijisayna in Hawlaha codbixinta Guud ahaan ee aftida ka dhacday Degmooyinka Dalka JSL la

waafajiyay Qodobada kor ku tilmaaman ee Xeerka aftida.

MARKAY U SUGNAATAY: In isugeynta Guud ahaan natiijada aftida ee Degmooyinka ay noqotay;

1. Tirada Dadka is diiwaan geliyay= 1,188,747.
2. Tirada Dadka ka codbixiyay Degmooyinka Dalka= 1,187,833.
3. Warqadaha Codbixinta ee ansaxay= 1,183,242.
4. Warqadaha codbixinta ee aan ansixin=4,591.
5. Tirada codadka Dadka ogolaaday Dastuurka (Haa) ay yihiin= 1,148,940
6. Tirada codadka Dadka Diiday Dastuurka (Maya) ay yihiin = 34,302

MARKAY ARAGTAY: Doodii iyo falanqayntii ay ka yeelatay Natiijada aftida iyo Hawlihii la xidhiidhay.

MARKAY TIXGELISAY: Qod. 46aad ee Xeerka Aftida Dastuurka, iyo dhammaan dhacdooyinka kor ku xusan.

## WAXAY GO'AAMISAY:

1. In Natiijada aftida Dastuurka JSL ay qeexayso in ay ummadda Somaliland Rabitaankeeda ku ogolaaday dastuurka tiro dhan: = 1,148,940 oo cod una Dhiganta 96%, iyadoo tirade diiday

dastuurka ay dhan tahay= 34,302 cod una dhiganta 3%.

2. In aftida loo qaaday 31/05/2001, ee Dastuurka JSL ee ku meel gaadhka ahaa laga bilaabo 13/6/2001 uu noqday mid ansaxa oo si rasmi ah lagaga dhaqmayo dalka JSL.

3. Waxaa go'aankan lagu dhawaaqay maanta oo Arbaca ah taariikhdu tahay 13/06/2001. Saacaduna tahay 11:00.

## GUDDIGA GARSOORKA:

1. Cismaan Xuseen Khayre  Guddoomiye______
2. Sh. Maxamed Xasan Ducaale  Xubin _________
3. Shawqi Cilmi Cali  "________________
4. Maxamed Yuusuf Caynaan  "________________
5. Sh. Maxamed Cabdi Naaleeye  "________________

Tifatirka Natiijada Aftida Dastuurka ee ka dhacday Dalka JSL waxay ku lifaaqan tahay Go'aankan.

## Tusmada Dastuurka
## JAMHUURIYADDA SOMALILAND

Arar Page16-18

QAYBTA 1aad
XUBINTA 1AAD
Tilmaanta Guud

1- Qod.1aad: Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland ……………………………………………………Page 19
2- Qod. 2aad: Dalka Jamhuuriyadda Somaliland ……………………………………………………Page 19
3- Qod. 3aad: Magaalo-madaxda……………Page 20
4- Qod. 4aad: Jinsiyadda………………………Page 20
5- Qod. 5aad: Diinta……………………………Page 20
6- Qod. 6aad: Afka………………………………Page 21
7- Qod. 7aad: Calanka, Astaanta iyo Heesta Qaranka……………………………………………Page 21

**XUBINTA 2AAD**
**Mabaadi'da Guud**

8- Qod. 8aad: Sinnaanta Muwaadiniinta…Page 22
9- Qod. 9aad: Nidaamka Siyaasadeed……..Page 22
10- Qod. 10aad: Xidhiidhka Debedda…………Page 22
11- Qod. 11aad: Dhaqaalaha Dalka………….Page 23
12- Qod. 12aad: Hantida Guud, Khayraadka Dabiiciga ah iyo Wax-soo-saarka Wadaniga ah………………Page 24
13- Qod. 13aad: Baananka………………………Page 25
14- Qod. 14aad: Cashuuraha, Takaaliifta iyo Ribada ……………………………………………………… Page 25
15- Qod. 15aad: Waxbarashada Dhallinyarada iyo Isboortiga…………………………………………Page 25
16- Qod. 16aad: Horumarinta Cilmiga iyo Suugaanta, Hiddaha iyo Dhaqanka………………………Page 26
17- Qod. 17aad: Caafimaadka…………………Page 27
18- Qod. 18aad: Deegaanka iyo Wax-ka-qabashada Aafooyinka………………………………………Page 27

19- Qod. 19aad: Daryeelka Qaybaha Bulshada Baylahsan……………………………………………..Page 27
20- Qod. 20aad: Shaqada, Farsamada, Daryeelka iyo Badbaadinta Shaqaalaha……………………………Page 27

## XUBINTA 3AAD
## Xuquuqda Qofka, Xorriyaadka Asaasiga ah iyo Waajibaadka Saaran Muwaadinka

21- Qod. 21aad: Hirgelinta iyo Fasiraadda….Page 28
22- Qod. 22aad: Xuquuqda Siyaasadeed, Dhaqaale, Bulsho iyo Xaqa Doorashada………………Page 29
23- Qod. 23aad: Xorriyadda Dhaq-dhaqaaqa iyo Is-abaabulka……………………………………Page 29
24 Qod. 24aad: Xaqa Nolosha, Nabadgelyaynta Jidhka Xurmaynta Magac-samida iyo Dambiyada laga galo Xuquuqda Aadamiga…………….Page 29
25- Qod. 25aad: Xaqa Xorriyadda Dammaanad Qaadka iyo Shuruudaha Xuquuqda iyo Xorriyaadka……………………………………Page 30
26- Qod. 26aad: Ciqaab iyo Dembi……………Page 30
27- Qod. 27aad: Xuquuqda Qofka Xorriyadda laga qaaday……………………………………………Page 31
28- Qod. 28aad: Xaqa Dacwadda iyo Isdifaaca ……………………………………………………Page 31
29- Qod. 29aad: Xurmaynta Hoyga……………Page 32
30- Qod. 30aad: Xorriyadda Isgaadhsiinta….Page 32
31- Qod. 31aad: Xorriyadda Lahaanshaha Hanti-Gaarahaaneed…………………………………………Page 32
32- Qod. 32aad: Xorriyadda Bannaan-baxa iyo Ra'yi Dhiibashada,Saxaafadda iyo Warbaahinta kale..Page 33
33- Qod. 33aad: Xorriyadda Caqiidada………Page 33
34- Qod. 34aad: Waajibaadka Muwaadinka iyo Ciqaabta Gudasho La'aanta Waajibaadka………Page 33
35- Qod. 35aad: Isu celinta Eedaysanayaasha Ama Dembiilayaasha iyo Magangelinta Siyaasadeed ……………………………………………………Page 34
36- Qod. 36aad: Xuquuqda Haweenka………Page 34

# QAYBTA LABAAD
## Qaab-dhismeedka Qaranka

37- Qod. 37aad: Awoodda iyo Karaamada Qaranka ......................................................Page 35

## XUBINTA 1AAD
## Waaxda Xeer dejinta

38- Qod. 38aad: Baarlamaanka iyo Fadhiyada Wada jirka ah......................................................Page 35

### Golaha Wakiilada

39- Qod. 39aad: Tilmaanta Guud ee Golaha ......................................................Page 37
40- Qod. 40aad: Tirada Golaha iyo Doorashadiisa ......................................................Page 37
41- Qod. 41aad: Shuruudaha Qofka Isu Taagaya Doorashada..................................................Page 37
42- Qod. 42aad: Muddada Xilka iyo Xilliga Doorashada..................................................Page 37
43- Qod. 43aad: Xarunta Golaha..................Page 38
44- Qod. 44aad: Isugu Yeedhidda Golaha Cusub ......................................................Page 38
45- Qod. 45aad: Fadhiyada Golaha Wakiilada ......................................................Page 38
46- Qod. 46aad: Kal-fadhiyada iyo Habaynta Golaha Wakiilada......................................................Page 39
47- Qod. 47aad: Mushaharka iyo Gunnada Golaha Wakiilada......................................................Page 40
48- Qod. 48aad: Reebbanaanta Qabashada Xil Kale ......................................................Page 40
49- Qod. 49aad: Dhawrsanaanta Xubinta Golaha Wakiilada......................................................Page 40
50- Qod. 50aad: Waayidda Xubinnimada Golaha Wakiilada......................................................Page 41
51- Qod. 51aad: Buuxinta Jagada Golaha Wakiilada ......................................................Page 41
52- Qod. 52aad: Shaqaalaha Golaha Wakiilada ......................................................Page 41

GOLAHA GUUD EE QARANKA JSL

53- Qod. 53aad: Awoodda iyo Waajibaadka Golaha Wakiilada……………………………………………Page 42
54- Qod. 54aad: Awoodda Xeer-dejinta ee Golaha Wakiilada……………………………………………Page 43
55- Qod. 55aad: Miisaaniyadda ……………………………………………Page 43
56- Qod. 56aad: Kala Diridda Golaha Wakiilada ……………………………………………Page 44

**XUBINTA 2AAD**
**Golaha Guurtida**

57- Qod. 57aad: Tilmaamaha Guud ee Golaha Guurtida……………………………………………Page 45
58- Qod. 58aad: Doorashada Xubinta Golaha iyo Muddada Xilka……………………………………Page 45
59- Qod. 59aad: Shuruudaha Qofka loo Dooranayo Golaha Guurtida……………………………………Page 45
60- Qod. 60aad: Tirada Golaha Guurtida……Page 46
61- Qod. 61aad: Awoodda iyo Waajibaadka Golaha Guurtida……………………………………………Page 46
62- Qod. 62aad: Fadhiga ugu Horreeya ee Golaha Guurtida……………………………………………Page 47
63- Qod. 63aad: Xoghayaha Golaha iyo La-taliyayaal ……………………………………………Page 47
64- Qod. 64aad: Xeer-hoosaadka Golaha……Page 47
65- Qod. 65aad: Mushaharka iyo Gunnada Golaha Guurtida……………………………………………Page 47
66- Qod. 66aad: Dhawrsanaanta Xubinta Golaha Guurtida……………………………………………Page 48
67- Qod. 67aad: Shaqo-ka-tegidda Xubinta Golaha Guurtida……………………………………………Page 48
68- Qod. 68aad: Waayidda Xubinimada Golaha Guurtida……………………………………………Page 48
69- Qod. 69aad: Kala-diridda Golaha…………Page 48
70- Qod. 70aad: Reebbanaanta Qabasho Xil kale iyo uga Faa'iidaysiga Xilka Dano Gaar ah……………Page 48
71- Qod. 71aad: Fadhiyada iyo Kal-fadhiyada ……………………………………………Page 49
72- Qod. 72aad: Bannaanshaha Jagada Golaha Guurtida iyo soo buuxinteeda………………………Page 49

73- Qod. 73aad: Xarunta Golaha Guurtida…Page 49
74- Qod. 74aad: Soo-Bandhigidda Mashruuc-Sharci ……………………………………………………Page 49
75- Qod. 75aad: Soo-saaridda, Faafinta iyo Dhaqan-gelinta Xeerka………………………………………Page 50
76- Qod. 76aad: Mashruuc-Sharci……………Page 50
77- Qod. 77aad: Habka loo Raaco Xeer-dejinta ……………………………………………………Page 50
78- Qod. 78aad: Mashruuc-sharci kasta aan ahayn kuwa Maaliyadda……………………………………Page 51
79- Qod. 79aad: Eedaynta Xubnaha Golayaasha ……………………………………………………Page 52

## QAYBTA 3AAD
### Waaxda Fulinta

### XUBINTA 1AAD

80- Qod. 80aad: Madaxweynaha iyo Madaxweyne-ku-xigeenka…………………………………………………Page 53
81- Qod. 81aad: Waaxda Fulinta………………Page 53
82- Qod. 82aad: Shuruudaha Qofka loo Dooranayo Madaxweyne ama Madaxweyne-ku-xigeen………Page 53
83- Qod. 83aad: Habka Doorashada…………Page 54
84- Qod. 84aad: Dhaarta Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha……………………………Page 55
85- Qod. 85aad: Waxyaabaha ka Reebban Madaxweynaha iyo Madaxweyne-ku-xigeenka….Page 55
86- Qod. 86aad: Bannaanaanta Jagada iyo Habka uu Madaxweynuhu ama Madaxweyne-Ku-xigeenku Xilka uga Tegi karo……………………………………………Page 55
87- Qod. 87aad: Mushaharka iyo Gunnada ..Page 56
88- Qod. 88aad: Muddada Xilka………………Page 56
89- Qod. 89aad: Habka Buuxinta Jagada Bannaanaatay…………………………………………Page 56

### XUBINTA 2AAD

90- Qod. 90aad: Awoodaha Madaxweynaha ..Page 58

91- Qod. 91aad: Awoodaha Madaxweyne-ku-xigeenka ..........................................................Page 59
92- Qod. 92aad: Awoodaha kale ee Madaxweyne ee La Xidhiidha Xeerarka Degdegga ah.................Page 60
93- Qod. 93aad: Hab-maamuuska Madaxda Sare ee Qaranka............................................................Page 60
94- Qod. 94aad: Golaha Wasiirada...............Page 61
95- Qod. 95aad: Sii-haynta Xilka..................Page 62
96- Qod. 96aad: Eedaynta iyo Maamuus-ka-Xayuubinta Madaxweynaha, Ku-xigeenka Madaxweynaha iyo Wasiirada..........................Page 62

## QAYBTA 4AAD
### XUBINTA 1AAD
### Waaxda Garsoorka

97- Qod. 97aad: Waaxda Qaranka................Page 63
98- Qod. 98aad: Awoodda Garsoorka u Gaarka ah ..........................................................Page 63
99- Qod. 99aad: Dhismaha Garsoorka..........Page 64
100- Qod. 100aad: Maxkamadaha...................Page 64
101- Qod. 101aad: Maxkamadda Sare ............Page 64
102- Qod. 102aad: Maxkamadaha Hoose.........Page 65
103- Qod. 103aad: Xeer-ilaalinta....................Page 65
104- Qod. 104aad: Maxkamadaha Ciidamada iyo Xeer-ilaalintooda..................................Page 65
105- Qod. 105aad: Magacaabidda Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Garsoorayaasha Maxkamadda Sare........................................................Page 65
106- Qod. 106aad: Xidhiidhka Hay'adaha Garsoorka iyo Wasaaradda Caddaaladda...............................Page 66

## QAYBTA 5AAD
### Qodobo kala duwan
### XUBINTA 1AAD

107- Qod. 107aad: Guddida Caddaaladda........Page 66
108- Qod. 108aad: Hawsha Guddida Caddaaladda ..........................................................Page 67

## XUBINTA 2AAD

109- Qod. 109aad: Qaab-dhismeedka Dalka....Page 68
110- Qod. 110aad: Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka.........................................Page 68
111- Qod. 111aad: Golayaasha Gobollada iyo Degmooyinka.........................................Page 68
112- Qod. 112aad: Baahinta Awoodda Maamulka ..........................................................Page 69

## XUBINTA 3AAD

113- Qod. 113aad: Hay'adaha Dawladda ee Gaarka ah ..........................................................Page 70
114- Qod. 114aad: Magacaabista iyo Xil-ka-qaadista Madaxda Hay'adaha.......................................Page 70

## XUBINTA 4AAD
## Guddida Culimada

115- Qod. 115aad: Waajibaadka Guddida........Page 71
116- Qod. 116aad: Tirada Guddida iyo Muddada Xilka ..........................................................Page 71
117- Qod. 117aad: Shuruudaha Xubnaha.......Page 71
118- Qod. 118aad: Waxyaabaha ka Reebban Xubnaha ..........................................................Page 72
119- Qod. 119aad: Magacaabidda Xubnaha Guddida Culimada.................................................Page 72
120- Qod. 120aad: Bannaanaanshaha Xubinimada Guddida Culimada.......................................Page 72
121- Qod. 121aad: Mushaharka iyo Gunnada ..........................................................Page 73
122- Qod. 122aad: Xeerka Hay'adaha ..........................................................Page 73

## XUBINTA 5AAD

123- Qod. 123aad: Mabaadi'da Ciidanka Qaranka ..........................................................Page 73

124- Qod. 124aad: Ciidamada Boolisa iyo Asluubta ……………………………………………………Page 73
125- Qod. 125aad: Diyaarinta Xeerka Aftida iyo Magacaabidda Guddida Qabanqaabinta Aftida…Page 74
126- Qod. 126aad: Wax-ka-beddelka iyo Kaabidda Dastuurka……………………………………………Page 74
127- Qod. 127aad: Xuduudda Wax-ka-beddelka iyo Kaabida Dastuurka……………………………………Page 75
128- Qod. 128aad: Saldhigga iyo Sarraynta Dastuurka ……………………………………………………Page 75
129- Qod. 129aad: Dhaarta Dastuuriga ah…..Page 75
130- Qod. 130aad: Dhaqan-gelinta Dastuurka iyo Qodobada kala guurka………………………………Page 76

BISMILLAAHI AL-RAXMAANI AL-RAXIIM

## *ARAR*

IYADOO UU AYIDSAN YAHAY go'aamadii Shirkii Beelaha Somaliland ee Burco ee 27kii April ilaa 5tii May 1991kii ee lagula soo noqday madax-bannaanida laga soo bilaabo 18 May, 1991kii;

IYADOO UU KA SHIDAAL QAADANAYO Shirweynihii Guurtida Beelaha Somaliland ee Boorama ee 24kii Jeniwari ilaa 25kii May 1993kii ee lagu guddoonsaday Axdiga Qaranka, kaas oo:

- Waajibiyey in muddada kala guurka ah la diyaariyo, aftina loo qaado Dastuur Qaran oo beddela Axdiga Qaranka.
- Si cad u taabtay mabaadi'da Dastuurka iyo qaab-dhismeedka Dawladda iyada oo uu ku qanacsan yahay xaqa aan cidina ka duudsiyi karin ee uu u leeyahay aaya-ka-tashigiisa.

IYADOO UU WAAYO-ARAG U YAHAY cawaaqib xumada Dastuur aan ku salaysnayn caqiidada, dhaqanka iyo doonista ummadda ee lagu soo maamulayey muddo soddon sannadood ah;

IYADOO UU WAAYO-ARAG U YAHAY cidhib xumada iyo dhibaatada xukunka ku dhisan talo-maroorsiga iyo keli-talisnimada ee dalku ku soo jiray muddo ka badan labaatan sannadood, kana feejigan dib-u-soo noqoshada xukun noocaas ah;

IYADOO UU XUSUUSAN YAHAY halgammadii isdaba jooga ahaa ee shacbiga sida kii Daraawiishta, Culimada Diinta iyo Axsaabta;

IYADOO UU MAANKA KU HAYO halgankii kululaa ee isbahaysigii ururka SNM hogaaminayey u soo maray dib-ula-soo noqoshada madax bannaanida ee loo huray naf iyo maalba si loo helo nidaam dawladeed oo ummadda nasteex u ah;

IYADOO UU HIGSANAYO dawladnimo ummadda wada deeqda, oo la mahadiyo, kuna dhisan sinnaan iyo caddaalad;

IYADOO UU YAQIINSAN YAHAY in lagu gaadhi karo degganaansho iyo xasillooni waarta, is-waafajinta la is-waafajiyo dhaqan-maamuleedka dalka iyo caqiidada ummadda;

IYADOO UU AAMINSAN YAHAY in ummadda Somaliland tahay qoys wax walba wadaaga sida Diinta, dhaqanka, caadooyinka iyo afka, wax ay ku kala duwan tahay sinaba u jirin, diyaarna u tahay in ay wada dhisato dawlad ay u siman tahay;

IYADOO UU OGSOON YAHAY in diyaarinta Dastuurku soo martay marxalado iyo guddiyo kala duwan, oo ay ka mid ahayd guddidii isku-soo-dubbarididda Dastuurka ee Shirweynihii 3aad u xilsaaray isku shaandhaynta labadii nuqul taariikhdii 26/11/96, uguna dambaysay kaabiddii iyo wax-ka-beddelkii Dastuurka ee labada Gole Baarlamaan taariikhdiisu ahayd 30 April 2000, laguna saleeyey arrimaha soo socda;-

b. Shareecada Islaamka.

t. Go'aan qaadasho ku timaadda talo-wadaag

j. Isu-dheellitirnaanta awoodda dawladnimo oo u qaybsanta; Sharci-dejinta, Fulinta iyo Garsoorka

x. Baahinta iyo hoos-u-daadejinta maamulka Xukuumadda (Decentralisation).

kh. Dammaanad-qaadista lahaanshaha gaar ahaaneed iyo xaq dhowridda suuqa xorta ah

d. Qiimo-weynida nolosha qofka oo la imanaysa sugidda xuquuqda aasaasiga ah iyo xorriyadaha qofka

r. Nabadgelyo iyo habsami kula dhaqanka dawladaha gobolka iyo adduunweynaha.

IYADOO UU SI FIICAN U DHUUXAY laf iyo ludba ararta iyo mucda Dastuurka:-

Shacbiga Somaliland, waxa uu halkan ku oggolaaday maanta oo taariikhdu tahay 22 Rabe'Al Awal 1422H (14 June 2001) isagoo adduunweynaha halkan ugu caddaynaya in uu Dastuurkan ka dhigtay Dastuurkiisa Qaran.

# QAYBTA KOWAAD

# TILMAANTA QARAN, MABAADI'DA GUUD & XORRIYAADKA ASAASIGA AH

## XUBINTA 1AAD
## TILMAANTA GUUD

### QODOBKA 1AAD
### QARANKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND

1. Dalkii Maxmiyadda ahaa ee 26kii Juun 1960kii gobanimadiisa ka qaatay Boqortooyadii Midowday ee Ingiriiska iyo Waqooyiga **Ayrland (United Kingdom of Great Britain and Northern Ireland)**, lana odhan jiray Maxmiyadda Somaliland, kuna biiray Soomaaliya 1dii July 1960kii si ay u wada curiyaan Jamhuuriyadda Soomaaliya (Somali Republic), ee kula soo noqday gooni-isu-taagiisa Go'aankii Shirkii Beelaha Somaliland ee Burco 27kii April ilaa 15 May 1991kii, waxa uu halkan ku noqonayaa sida waafaqsan Dastuurka, dal madax bannaan oo leh xaqa iyo karaamada Qaranimadiisa, kuna magacaaban "**Jamhuuriyadda Somaliland**".
2. Awoodda iyo karaamada Qaranimada waxa leh shacbiga; wuxuuna u adeegsanayaa si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka kale.

### QODOBKA 2AAD
### DALKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND

1. Dalka Jamhuuriyadda Somaliland wuxuu fidsan yahay bed (Area) ahaan dalkii la odhan jirey Maxmiyadda Somaliland oo tilmaan ahaan ku yaalla dhigaha (Latitude) $8^{o}$ ilaa $11^{o}$ 30' Waqooyiga Dhulbadhaha iyo loolka (Longtitude) $42^{o}$ 45' ilaa $49^{o}$ Bariga; waxaanay soohdimihiisu ka kooban yihiin berriga, jasiiradaha, biyaha gobolleed, dhulka iyo badaha hoostooda, hawada sare iyo xeebleyda (**Continental shelf).**

2. Jamhuuriyadda Somaliland waxay xad la wadaagtaa dhinaca Waqooyi Gacanka Cadmeed; dhinaca Bari Soomaaliya; dhinaca Koonfureed iyo dhinaca Galbeed Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Itoobiya; dhinaca Waqooyi Galbeed Jamhuuriyadda Jabuuti.
3. Dhulka Qaranku waa muqaddas; waana laguma xad gudbaan.

**QODOBKA 3AAD**
## MAGAALO-MADAXDA

Magaalo-madaxda Jamhuuriyadda Somaliland waa Hargeysa.

**QODOBKA 4AAD**
## JINSIYADA

1. Qof kasta oo u dhashay Somaliland, kana issirran dadkii deggenaa dalka Somaliland 26kii Juun 1960kii iyo ka hor, waxa loo aqoonsanayaa muwaadin Somaliland.
2. Xeer baa caddaynaya sida lagu heli karo ama lagu waayi karo jinsiyadda Somaliland.

**QODOBKA 5AAD**
## DIINTA

1. Diinta Qaranka Somaliland waa Diinta Islaamka; waxaana geyiga Somaliland ka reebban faafinta diin aan ahayn Diinta Islaamka.
2. Xeerka dalka waxaa laga qaadanayaa Shareecadda Islaamka; waxaana reebban wixii xeer ah ee ka soo horjeeda.
3. Dawladdu waxay oogaysaa shacaa'irta diiniga ah (umuurta Diinta); waxaanay fulinaysaa axkaamta Shareecadda. Sidoo kale waxay ka hortegaysaa fisqiga iyo anshax-xumada.
4. Tirsiga taariikhda waxa laga raacayaa tan Islaamiga ah ee Hijriyada iyo tan Miilaadiyada ah.

## QODOBKA 6AAD
## AFKA

1. Afka rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Somaliland waa Af-Soomaaliga; afka labaadna waa Af-Carabiga.
2. Afafka kale waxa loo adeegsan karaa wixii looga maarmi waayo.

## QODOBKA 7AAD
## CALANKA, ASTAANTA & HEESTA QARANKA

1. Calanka Jamhuuriyadda Somaliland wuxuu ka kooban yahay saddex midab oo isle'eg oo ballaadh u goglan. Midabka sare waa Doog, dhexdiisana ay ku qoran tahay **Laa-ilaaha Illa-Laahu Muxamedun Rasuulu-Allaah** oo Far-Carabi ah, oo midab cad ah; midabka dhexe waa caddaan ay badhtanka kaga taallo xiddig madow oo shan geesley ah, madaxyo simanna leh; midabka hoose waa casaan saafi ah.
2. Astaanta Qaranku waa Galaydh Bunni ah oo ay laabta kaga qoran tahay "ALLAAHU AKBAR" oo Far Carabi ah; kuna taagan laba gacmood oo is-gacan qaadaya, miisaana ka sarreeyo ay labadiisa kafadood hareeraha Galaydhka ka laalaadaan. Laba caleemood oo doog ah ayaa hoosta iyo hareeraha kaga wareegsan Galaydhka; labada caleemood baarkooda inta u dhaxaysa waxa ku qoran "Bisinka" oo Far Carabi ah.
3. Heesta Qaranku waa mid muujinaysa bartilmaameedyada Dastuurka, caqiidada ummadda, hab-dhaqmeedka wada-tashi; waxanay yeelanaysaa miyuusik u gaar ah oo ka duwan kuwa dalalka kale; waxaana lagu soo saarayaa xeer.
4. Wax-ka-beddelka ama bedelaadda calanka, astaanta, iyo heesta qaranka, waxa jidaynaya go'aan Golaha Wakiilada.

# XUBINTA 2AAD
# MABAADI'DA GUUD

## QODOBKA 8AAD
## SINNAANTA MUWAADINIINTA

1. Muwaadiniinta Somaliland iyadoon lagu kala saarayn midabka, qabiilka, dhalashada, luqada, lab iyo dhedig, hantida, mudnaanta, afkaarta iwm, waxay sharciga hortiisa ku leeyihiin xuquuq iyo waajibaad siman.
2. Kala sarraynta iyo takoorka ku salaysan issirka, abtirsiga, dhalashada iyo deegaanku waa reebban yihiin, isla markaa barnaamijyada lagu cidhib tirayo dhaqamada xunxun ee soo jireenka ah waa waajib Qaran.
3. Ajaanibka dalka Somaliland sharci ku jooga waxay xeerka hortiisa ku leeyihiin xuquuq iyo waajibaad la siman tan muwaadiniinta, oo ay ka reebban tahay xuquuqda siyaasiga ah ee muwaadiniinta u gaarka ah.

## QODOBKA 9AAD
## NIDAAMKA SIYAASADEED

1. Nidaamka siyaasadeed ee Jamhuuriyadda Somaliland waxa saldhig u ah nabad, talo-wadaag, dimuqraadiyad iyo hannaanka xisbiyada badan.
2. Tirada xisbiyada siyaasiga ah ee dalka Jamhuuriyadda Somaliland Kama badnaan karaan saddex (3) xisbi.
3. Iyada oo xeer gaar ahi habayn doono qaabka loo furan karo xisbi siyaasi ah, waxaa reebban in xisbi lagu dhiso gobollaysi iyo qabyaalad.

## QODOBKA 10AAD
## XIDHIIDHKA DIBEDDA

1. Jamhuuriyadda Somaliland waxay dhawraysaa heshiisyadii ay Dawladdii hore loo odhan jiray Soomaaliya la gashay shirkad ama dawlad shisheeye, haddii aanu ka hor imanayn danta iyo maslaxadda Jamhuuriyadda Somaliland.

2. Jamhuuriyadda Somaliland waxay aqoonsan tahay, kuna dhaqmaysaa Axdiyada Qaramada Midoobay iyo Qaanuunka Dawliga ah; waxa kale oo ay xurmaynaysaa Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadamiga (**Universal Declaration of Human rights).**
3. Jamhuuriyadda Somaliland waxay aaminsan tahay mabaadi'da aayo-ka-talinta ummadaha adduunka.
4. Waxay aaminsan tahay in khilaafaadka siyaasiga ah ee abuurma lagu xallilo dariiq nabadeed iyo wada-hadal; waxay dhawraysaa jiritaanka soohdimaha dalalka kale.
5. Waxay ku dedaalaysaa in colaaddii raagtay oo dhex ooli jirtay dalalka Geeska Afrika lagu beddelo is af-garad iyo isku soo dhawaansho.
6. Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland waa Jamhuuriyad xor ah oo ka mid ah Ummadda Carbeed, Shucuubta Afrika iyo Caalamka Islaamka; sidaas daraadeed, waxay ku dedaalaysaa siday ugu biiri lahayd Jimciyada Qaramada Midoobay, Ururka Midnimadda Afrika, Jaamacadda Carabta iyo Ururka Dawladaha Islaamka.
7. Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland waxay ka soo horjeeddaa falalka argagaxis-nimada iwm, ujeeddo kasta ha lahaadeene.

## QODOBKA 11AAD
## DHAQAALAHA DALKA

1. Si loo xaqiijiyo kobcinta wax-soo-saarka, kor-u-qaadidda heerka nolosha, abuuridda goobo shaqo, iyo guud ahaan horumarinta dhaqaalaha dalka, Dawladdu waxay dejinaysaa siyaasadda guud ee dhaqaalaha, oo ku salaysan mabaadi'da suuqa xorta ah iyo is-garabsiga hantida gaar ahaaneed; hantida wadareed, hantida Qaranka iyo maalgelinta shisheeyaha.
2. Iyadoo la dhawrayo in aanu habka dhaqaale noqonin mid horseeda in barwaaqadu ku koobnaato ama ku ururto koox ama dad tiro yar, si aanay u dhalan dabaqado dhaqaale oo ka kooban kuwo wax haysta iyo kuwo aan wax haysan;

si aanay u balaadhan farqiga dhaqaale ee u dhaxeeya reer magaalka iyo reer miyiga, waxa Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland xaqiijinaysaa in adeegyada bulsho iyo fursadaha dhaqaale si cadaalad iyo sinnaan ah loo qaybiyo.

3. Maal-gelinta shisheeyaha ee dalka gudahiisa Dawladdaa damaanad qaadaysa; xeer baana lagu nidaaminayaa.

## QODOBKA 12AAD
## HANTIDA-GUUD, KHAYRAADKA DABIICIGA AH IYO WAX-SOO-SAARKA WADANIGA AH

1. Dhulku waa hanti guud oo ka dhaxeeya Ummadda; mas'uuiyadiisana Dawladdaa leh.
2. Daryeelka iyo ilaalinta maalka iyo awqaafta iyo hantida guud waa waajib saaran Dawladda iyo muwaadiniinta, waxaana qeexaya xeer.
3. Xukuumaddu waxay awood u leedahay in ay yeelato, gacanta ku hayso, hanti-guurto ama ma-guurto ah, in ay iibsato, iibiso, kiraysato, kirayso, ku bedelato qiimo u dhigma ama ku samayso hantidaas tasaruf kasta oo sharciga waafaqsan.
4. Khayraadka dabiiciga ah ee dalka waxaa mas'uul ka ah Dawladda-dhexe, waxaanay qaadaysaa tallaabo kasta oo suurta gal ah si loo baadho, loogana faa'iidaysto khayraadka ku jira berriga iyo badda dalka, ilaalinta khayraadka dabiiciga ah iyo sida ugu habboon ee looga faa'iidaysan karo xeer ayaa qeexaya.
5. Hantida guud ee lahaanshaheeda ama ka faa'iidaysigeeda loo baahdo in la wareejiyo waxay ku wareegi kartaa si xeerka waafaqsan.
6. Dawladdu waxay dhiirri-gelinaysaa wax-soo-saarka wadaniga sida beeraha, xoolaha nool, kalluunka, macdanta, faleenka, xabagta iyo warshadaha ku shaqeeya wax-soo-saarka wadaniga ah.
7. Sekadu waa rukun Islaamiya, habaynteedana waxa caddaynaya xeer-gaar ah.

## QODOBKA 13AAD
## BAANANKA

Dawladdu waxay yeelanaysaa Baan-dhexe oo hoggaamiya siyaasadda iyo ilaalinta Lacagta Dalka. Waxa kale oo la suurto-gelinayaa furitaanka Baanan-ganacsi iyo horu-marineed iyada oo mudnaanta la siinayo kuwa gaar-ahaaneed.

## QODOBKA 14AAD
## CASHUURAHA TAKAALIIFTA & RIBADA

1. Waajibinta cashuuraha iyo wixii takaaliif ah waxa loo eegayaa danta iyo maslaxadda bulshada. Sidaa darteed, cashuur ama takaaliif aan xeer jidayn lama qaadi karo.
2. Curinta, dhaafidda iyo wax ka beddelka cashuuraha iyo wixii takaaliif ah ee kale xeer ayaa jidaynaya.
3. Ribada iyo macaamilooyinka ganacsi ee dhib u leh bulshada iyo ku xoolaysiga sifo aan sharci ahayni way reebban yihiin.

## QODOBKA 15AAD
## WAXBARASHADA, DHALLINYARADA IYO ISBOORTIGA

1. Dawladdu waxay mudnaan gaar ah siinaysaa horumarinta, ballaadhinta iyo faafinta cilmiga iyo tacliinta, iyadoo u aragta in ay waxbarashadu tahay maal-gelinta ugu habboon ee kaalinta ugu weyn ka qaadan karta horumarinta siyaasadeed, dhaqaale iyo bulsho.
2. Waxbarashadu waa mid u danaynaysa dadweynaha, kuna habaysan waayaha iyo deegaanka gaar ahaaneed ee bulshada Somaliland.
3. Barashada iyo tarbiyadda Diinta Islaamku waa dariiqad asaasi ah; dhammaan heerarka waxbarashadana waa ku khasab, isla markaana horumarinta dugsiyada Qur'aanku waa waajib saaran Dawladda.
4. Muwaadiniinta iyo shisheeyaha dalka deggani waxay furan karaan dugsiyo iyo barnaamijyo waxbarasho iyo

tababaro oo heer kasta ah oo waafaqsan xeerka waxbarashada.

5. Dawladdu waxay mudnaanta koowaad siinaysaa waxbarashada asaasiga ah; waxaanay u hawl galaysaa in gobollada iyo degmooyinka lagu baahiyo waxbarashada asaasiga ah.
6. Cidhib tirka akhris-qoris la'aanta iyo waxbarashada dadka waaweyni waa waajib ummadeed, waana in shacab iyo Dawladba awood la isugu geeyo fulinta waajibkaas.
7. Siyaasadda Qaran ee waxbarashada asaasiga ahi waa lacag la'aan.
8. Si dhallinyarada loogu xaqiijiyo koritaanka jidhka iyo maskaxda oo caafimaad qaba, korna loogu qaado barbaarintooda iyo dareenkooda Dawladdu waxay ahmiyad gaara siinaysaa horumarinta iyo dhiiri-gellinta ciyaaraha jidhka iyo isboortiga, kuwaas oo loo aqoonsan doono maadooyinka asaasiga ah oo ka mid ah manhajka waxbarashada dugsiyada dawladda iyo kuwa kale.

## QODOBKA 16AAD
## HORUMARINTA CILMIGA, SUUGAANTA, HIDDAHA IYO DHAQANKA

1. Dawladdu waxay horumarinaysaa cilmiga iyo suugaanka; waxayna dhiiri-gelinaysaa hal-abuurka iyo cilmi-baadhista.
2. Xuquuqda qoraalka, hal-abuurka iyo hindisaha xeer ayaa caddaynaya.
3. Dawladdu waxay horumarinaysaa hiddaha iyo dhaqanka suubban ee bulshada iyada oo isla markaa laga faa'iidaysanayo aqoonta bulshada adduunka. Waxa si gaar ah loo dhiirri gelinayaa fanka, suugaanta iyo ciyaaraha wadaniga ah, iyadoo la dhawrayo aadaabta Islaamka.
4. Dawladdu waxay horumarinaysaa hiddaha iyo dhaqanka suubban ee bulshada, waxayna tirtiraysaa caadooyinka wax u dhimaya Diinta, horumarka dhaqanka iyo caafimaadka bulshada. Samaynta khamriga iyo beerista ama ka ganacsiga iyo

isticmaalka maandooriyuhu geyiga Somaliland way ka reebban yihiin.

### QODOBKA 17AAD
### CAAFIMAADKA

1. Dawladdu iyadoo fulinaysa siyaasadda daryeelka caafimaadka guud, waxa waajib ka saaran yahay ka-haqab-tirka dalka qalabka ka-hortagga cudurrada faafa, helitaanka daaweyn lacag la'aan ah iyo daryeelka fayo dhawrka guud.
2. Dawladda waxa xil ka saran yahay horumarinta iyo baahinta adeegyada caafimaadka iyo xarumaha daryeelka caafimaadka ee gaarka ah.

### QODOBKA 18AAD
### DEEGAANKA IYO WAX-KA-QABASHADA AAFOOYINKA

1. Dawladdu waxay mudnaan gaar ah siinaysaa ilaalinta iyo fayo-qabka deegaanka oo asaas u ah caafimaadka bulshada iyo dhawrista khayraadka dalka. Sidaas darteed, habdhaqanka iyo waxyeelada loo gaysto deegaanka xeer ayaa qeexaya.
2. Aafooyinka dhaca sida abaaraha, duufaanada, cudurrada faafa, dhul gariirka iyo dagaalada waxay Dawladdu ka yeelanaysaa ku-talagal.

### QODOBKA 19AAD
### DARYEELKA QAYBAHA BULSHADA BAYLAHSAN

Dawladdu waxay xil iska saaraysaa caafimaadka, daryeelka, xannaanada iyo waxbarashada hooyada, dhallaanka, naafada cid xannaanaysa aan lahayn iyo dadka aan xiskoodu dhammayn ee aan lahayn awood iyo cid kafaalaqaada.

### QODOBKA 20AAD
### SHAQADA, FARSAMADA, DARYEELKA IYO BADBAADINTA SHAQAALAHA

1. Shaqadu waa xaq uu leeyahay kuna waajib ah muwaadin kasta oo gudan kara. Sidaas darteed, dawladdu waxay xil iska saaraysaa shaqo abuuris iyo tayaynta tababarada shaqaalaha.
2. Ka shaqeysiinta carruurta, haweenka, shaqeynta saacadaha habeenimo iyo goobaha shaqada, fasaxyada iyo saacadaha shaqada waxaa qeexaya Xeerka Shaqada.
3. Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin mushahar u dhigma hawsha ay qabtaan, waxayna qof ahaan ama urur ahaanba gorgortan la geli karaan loo shaqeeyaha, waxana reebban shaqada oo la isku khasbo.
4. Dawladdu waxay ku dedaalaysaa in ay ka dhex abuurto shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha is-afgarad iyo xaqsoorid iyada oo sidaas xeer ku soo saaraysa.
5. Shaqaalaha dawladdu iyo xubnaha ciidamada qalabka sida waxay xaq u leeyihiin gunnada hawl-gabka iyo kaalmada bukaanka ama shilka iyo kaalmada qofka naafooba oo xeerka waafaqsan.
6. Dawladdu waxay horumarinaysaa habka taakulaynta, caymiska iyo badbaadinta shaqaalaha, waxaanay xoojinaysaa hay'adaha ku shaqada leh.

## XUBINTA 3AAD
## XUQUUQDA QOFKA, XORRIYAADKA ASAASIGA AH IYO WAAJIBAADKA SAARAN MUWAADINKA

### QODOBKA 21AAD
### HIRGELINTA IYO FASIRAADDA

1. Waaxaha Xeer-dejinta, Fulinta iyo Garsoorka ee Qaranka iyo kuwa dawladaha hoose ee gobollada iyo degmooyinka Jamhuuriyadda Somaliland, heer kasta ha ahaadeene, waxay u hoggaansamayaan shuruucda ku cad qodobada xubintan.
2. Qodobada la xidhiidha xuquuqda iyo xorriyaadka aasaasiga ah waxa loo fasirayaa si waafaqsan bayaannada caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha iyo xeerarka caalamiga ah ee Dastuurka ku xusan.

## QODOBKA 22AAD
## XUQUUQDA SIYAASADEED, DHAQAALE, BULSHO IYO XAQA DOORASHADA

1. Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qayb galo hawlaha siyaasadeed, dhaqaale, bulsho iyo hiddaha si waafaqsan xeerarka iyo Dastuurka.
2. Muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha xeerku tilmaamayo wuxuu xaq u leeyahay in la doorto, waxna uu doorto.

## QODOBKA 23AAD
## XORRIYADDA DHAQDHAQAAQA IYO IS-ABAABULKA

1. Qof kasta oo muwaadin ah ama si xeerka waafaqsan dalka ku jooga, waxa uu xor u yahay in uu dalka ka maro ama ka dego meel kasta oo uu doono, iyo weliba in uu ka baxo ama ku soo laabto dalka marka uu doono.
2. Arrimaha ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxa ka reebban meelaha ama waqtiyada xeerku ka reebo mariddeeda ama degitaankeeda.
3. Muwaadiniintu waxay xor u yihiin in ay isu habeeyaan ururro siyaasadeed, cilmiyeed, dhaqameed, bulsheed, xirfadeed, ama kuwa shaqaale si waafaqsan xeerka.
4. Waxaa reebban urur kasta oo leh ujeeddooyin lid ku ah danaha ummadda ama qarsoodi ah ama leh qaab ciidan ama hubaysan amaba kuwa kale ee khilaafsan xeerka weji kasta ha lahaadeene.

## QODOBKA 24AAD
## XAQA NOLOSHA, NABAD GALYEYNTA JIDHKA, XURMAYNTA MAGAC-SAMIDA IYO DAMBIYADA LAGA GALO XUQUUQDA AADAMIGA

1. Nafta aadamuhu waa deeq Ilaahay, waana qaali; qof kastaana wuxuu xaq u leeyahay noloshiisa, wuxuuna ku waayi karaa oo keliya marka maxkamad horteed

uu ku caddaado dembi uu xeerku jideeyey in dil lagu mutaysan karo.

2. Qofku wuxuu xaq u leeyahay in la nabadgaliyo jidhkiisa; ciqaabta jidhka iyo waxyeelo kasta oo loo geysto way reebban tahay.
3. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in la xurmeeyo sharaftiisa, sumcadiisa iyo noloshiisa gaar ahaaneed.
4. Dambiyada laga galo xuquuqda qofka sida xasuuqa, dil maxkamad la'aan ah, jidh dilka iyo wixii la mid ah malaha muddo dhaaf.

## QODOBKA 25AAD
## XAQA XORRIYADDA, DAMMAANAD-QAADKA IYO SHURUUDAHA XUQUUQDA IYO XORRIYAADKA

1. Qofna xorriyaddiisa loogama qaadi karo si aan xeerka waafaqsanayn.
2. Ma bannaana in qofna la qabto, la baadho ama la xayiro, haddii uusan markaa dembi faraha kula jirin, ama aanu amar qabasho oo sababaysan ku soo saarin Garsoore awood u lihi.
3. Dawladda ayaa muwaadiniinta u dammaanad qaadaysa xuquuqda iyo xorriyadaha. Xeer ayaa qeexaya ciqaabta ka dhalan karta ku xad gudubkooda.
4. Dhammaan xorriyaadka qofka waxa shardi ah in ayna ka hor iman xeerarka anshaxa guud, xasiloonida dalka ama xuquuqda qofka kale.

## QODOBKA 26AAD
## CIQAAB IYO DEMBI

1. Ciqaab iyo dembi waa wixii qodob xeer ama qaanuun jideeyey, waxaana reebban in ciqaabta loo fuliyo hab aan xeerka waafaqsanayn.
2. Mas'uuliyadda dembi ciqaabeed waxay ku kooban tahay cidda geysatay oo keliya.
3. Eedaysanuhu waa dembi-laawe inta aanu maxkamad horteed kaga caddaanin dembi.

## QODOBKA 27AAD
## XUQUUQDA QOFKA XORRIYADDA LAGA QAADAY

1. Qofka xorriyadda laga qaaday waxa uu xaq u leeyahay in uu la kulmo sida ugu dhaqsaha badan qareenkiisa, qaraabadiisa ama ciddii kale ee uu codsado.
2. Qofka xorriyadda looga qaaday fal-dembiyeed lagu eedeeyey awgeed, waxa uu xaq u leeyahay in lagu hor geeyo maxkamad 48 (siddeed iyo afartan) saacadood gudahood, laga bilaabo marka la qabtay.
3. Waxa reebban in qofka lagu dirqiyo qirasho dembi, marag furid, ama dhaar. Mid kasta oo arrimahaa ka mid ah oo qofka khasab lagu marsiiyaana wax-ka-soo qaad ma laha.
4. Waxa reebban in qofka lagu xidho meel aanu xeerku bannayn.
5. Xeerka ayaa xadaynaya muddada ugu badan ee qof loo hayn karo baadhitaan.
6. Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in go'aan maxkamadi ku ridday uu racfaan uga qaato maxkamadda ka sarraysa.
7. Marka qof la qabto iyo marka la cusboonaysiinayo sii-hayntiisa waxa uu xaq u leeyahay in la ogeysiiyo arrintiisa cidda uu doorto.
8. Xabsigu waa edbin iyo toosin. Dawladana xil baa ka saaran kor-u-qaadidda akhlaaqda iyo xirfad baridda maxbuuska si uu ugu noqdo bulshada isaga oo yeeshay dhaqan suubban.
9. Ciqaabta lagu mutaysan karo jebinta faqradaha 1aad ilaa 7aad ee qodobkan xeer ayaa caddaynaya.

## QODOBKA 28AAD
## XAQA DACWADDA & ISDIFAACA

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu dacwad xeerka waafaqsan ka furto maxkamadda awoodda u leh.
2. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu iska difaaco maxkamadda horteeda.
3. Xaaladaha xeerku tilmaamayo Qaranku wuxuu kafaalo qaadayaa in uu bixiyo difaac lacag la'aan ah;

iyada oo saboolkana laga dhaafi karo ajuurada maxkamadda.

## QODOBKA 29AAD
## XURMAYNTA HOYGA

Hoyga iyo meelaha kale ee la deggan yahay waxay leeyihiin xurmayntooda; mana bannaana basaasiddooda, baadhidooda iyo geliddooda, haddaanu jirin amar garsoore oo sababaysan. Waxa waajib ah in si toos ah loogu akhriyo amarka garsooraha mulkiilaha ama degganaha hoyga inta aan la gelin. Baadhaha waxa ka reebban ku xad-gudubka amarka garsooraha.

## QODOBKA 30AAD
## XORRIYADDA ISGAADHSIINTA

Qofna lama fara-gelin karo qoraalladiisa gaarka ah, waraaqihiisa boosta ama xidhiidhkiisa isgaadhsiineed, marka laga reebo xaaladda uu xeerku baneeyo baadhitaankooda, daba-galkooda, ama dhegaysigooda iyada oo ay markaana waajib tahay in la helo amar garsoore oo sababaysan.

## QODOBKA 31AAD
## XORRIYADDA LAHAANSHAHA HANTI GAAR-AHAANEED

1. Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu si gaar ah u yeesho hanti, taas oo ay shardi tahay in uu ku helo waddo xalaal ah.
2. Hantida gaar ahaaneed ee lagu helay si xeerka waafaqsan, lalama wareegi karo dan guud awgeed mooyaane, iyadoo markaana la bixinayo cawil-celin munaasib ah.
3. Xeer ayaa xadaynaya waxyaabaha geli kara danta guud ee keeni kara la wareegidda hanti gaar-ahaaneed.

## QODOBKA 32AAD
## XORRIYADDA BANNAANBAXA, RA'YI-DHIIBASHADA, SAXAAFADDA IYO WARBAAHINTA KALE

1. Muwaadin kasta waxa uu xor u yahay in uu ra'yigiisa ku bandhigo qoraal, hadal, muuqaal, suugaan ama qaab kale oo xeerka waafaqsan.
2. Muwaadin kasta wuxuu xor u yahay in uu abaabulo kana qayb qaato, kulan ama bannaan-bax nabadeed oo xeerka waafaqsan.
3. Saxaafadda iyo warbaahinta kale waxay ka mid yihiin xorriyaadka asaasiga ah ee ra'yi-dhiibashada, waxayna leeyihiin madax-bannaanidooda; way reebban tahay tallaabo kasta oo lagu cabudhinayo; hawshoodana xeer baa nidaaminaya.

## QODOBKA 33AAD
## XORRIYADDA CAQIIDADA

1. Qof kasta wuxuu xor u yahay caqiidadiisa, lagumana qasbi karo in uu qaato tu kale. Shareecadda Islaamku ma oggola in qofka Muslimka ahi ka noqdo caqiidadiisa.
2. Masaajidku waa goob cibaado, waxaanu mudan yahay xurmayn. Waa goob lagu fidiyo Diinta iyo hanuuninta umadda diin iyo adduunyaba. Waxa reebban in laga jeediyo waxyaabaha ummadda kala kaxayn kara; dawladduna waxay ku leedahay ilaalin guud iyo kaalmayn wixii suurto-gal ah.

## QODOBKA 34AAD
## WAAJIBAADKA MUWAADINKA IYO CIQAABTA GUDASHO LA'AANTA WAAJIBAADKA

1. Muwaadin kasta waxa waajib ku ah adkaynta midnimada ummadda, ilaalinta jiritaanka Qaranimada iyo difaaca dalka iyo diinta si waafaqsan xeerka.
2. Qof kasta waxa ku waajib ah in uu xaq dhawro Dastuurka iyo xeerarka dalka.

3. Qof kasta waxa ku waajib ah in uu si hagar la'aan ah u bixiyo cashuurta iyo takaaliifta kale ee xeerku waajibiyey.
4. Qof kasta waxa waajib ka saaran yahay daryeelka, ilaalinta iyo badbaadada deegaanka.
5. Xeerka ayaa caddeynaya ciqaabta ka dhalan karta gudasha la'aanta waajibaadka ku xusan faqradda 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad.

## QODOBKA 35AAD
## ISU-CELINTA EEDAYSANAYAASHA AMA DEMBIILAYAASHA IYO MAGAN-GELINTA SIYAASADEED

1. Qofka shisheeyaha ah ee dalka ku soo galay ama ku joogay si xeerka waafaqsan ee weydiista magangelyo siyaasadeed, waa la siin karaa haddii uu buuxiyo shuruudaha ku xusan xeerka u dhigan magan-gelinta.
2. Ma bannaana in muwaadinka Somaliland loo dhiibo dawlad shisheeye.
3. Jamhuuriyadda Somaliland waxay dib u celin kartaa dambiile ama eedaysane dalkiisa ka soo cararay, haddii uu jiro heshiis dhex maray Jamhuuriyadda Somaliland iyo dalka weydiistay celintiisa.

## QODOBKA 36AAD
## XUQUUQDA HAWEENKA

1. Xuquuqda, xorriyaadka iyo waajibaadka Dastuurku xaqiijiyey, haweenku raga way ula siman yihiin, wixii Shareecada Islaamka midkood u gaar yeeshay mooyaane.
2. Xukuumaddu waa in ay dhiirri-gelisaa xeerna ka soo saartaa xaqa ay haweenku u leeyihiin in ay ka xoroobaan dhaqamada aan Shareecadda waafaqsanayn ee waxyeelada u leh jidhkooda iyo damiirkooda.
3. Haweenku waxay xaq u leeyihiin in ay hanti yeeshaan, maamulaan, kormeeraan, adeegsadaan, gudbin karaan si Shareecadda waafaqsan.

4. Si sare loogu qaado aqoonta iyo dakhliga haweenka iyo weliba daryeelka qoyska, haweenku waxay xaq u leeyihiin in loo fidiyo waxbarashada dhaqaalaha qoyska iyo in loo furo dugsiyada farsamada iyo xirfadaha gaarka ah iyo kuwa waxbarashada dadka waaweyn.

# QAYBTA LABAAD
## QAAB-DHISMEEDKA QARANKA

### QODOBKA 37AAD
### AWOODDA IYO KARAAMADA QARANKA

1. Eebaha ummadda Somaliland ku beeray geyigani waxa uu ugu deeqay awood iyo karaamo Qaranimo. Shacbiga Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu awooddaas iyo karaamadaas sida ku cad Dastuurka u igmaday dawlad ku dhisnaan doonta kuna dhaqmi doonta Dastuurka.
2. Dhismaha Qaranku wuxuu ka kooban yahay saddex waaxood oo kala ah: Xeer-dejinta, Fulinta iyo Garsoorka. Kala xadaynta awoodaha saddexda waaxood waxay noqon doonaan sida uu Dastuurku dhigayo. Waax waliba awoodda Dastuurku u gaar yeelay way u madax bannaan tahay.

# XUBINTA 1AAD
## WAAXDA XEER-DEJINTA

### QODOBKA 38AAD
### BAARLAMAANKA IYO FADHIYADA WADA JIRKA AH

1. Awoodda Xeer-dejinta ee Jamhuuriyadda Somaliland waxay gaar u tahay Baarlamaanka oo ka kooban laba Gole oo kala ah Golaha Wakiilada iyo Golaha Guurtida. Xilka xeer-dejintu uma wareegi karo cid ka baxsan Baarlamaanka.
2. Mashruuc-sharci Baarlamaanku oggolaadeen wuxuu xeer dhaqan gal ah noqonayaa marka uu

Madaxweynuhu u soo saaro hab waafaqsan Dastuurka.

3. Baarlamaanku xilgudashadiisa wuxuu ku salaynayaa Dastuurka iyo xeer-hoosaadyadiisa.
4. Himilooyinka xilgudashada Baarlamaanka waxa ugu muhiimsan arrimahan soo socda:-

b- Sugidda nabadgelyada iyo ammaanka Jamhuuriyadda iyo u madax-bannaanida maamulka dhulkeeda, baddeeda iyo hawadeeda.

t- In Jamhuuriyadda Somaliland yeelato dhammaan xeerarka ay u baahan tahay dawlad Islaam ah.

j- Hirgelinta xeerarka u degsan Jamhuuriyadda Somaliland iyo xaqiijinta taabba-galka cadaaladda oo saldhig u ah xasilloonida guud ee Jamhuuriyadda iyo isu-kalsamaanta iyo iskaashiga dadweynaha Somaliland.

5. Labada Gole ee Baarlamaanku waxay yeelanayaan fadhiyo ay wadaagaan iyo kuwo gaar u kala ah.
6. Labada Gole ee Baarlamaanku fadhiyo wadajir ah ayay ka yeelanayaan arrimaha ay ka mid yihiin:-

b- Dhegeysiga Warbixinta Madaxweynuhu ka jeediyo furitaanka labada Gole.

t- Marka laga doodayo ku biiridda Jamhuuriyadda Somaliland urur ama huwan gobolleed ama caalami ah ama ansixinta heshiisyada leh dabeecad gobolleed ama caalami.

j- Go'aaminta iyo ku dhawaaqidda xaaladaha dagaal marka Jamhuuriyadda Somaliland la soo gudboonaado dagaal.

x- Doodaha ku saabsan aafooyinka dabiiciga ah;

kh- Doodaha la xidhiidha xeerarka deg-degga ah;

d- Ansixinta magacaabidda Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.

r- Arrimaha kale ee 2da Gole la habboonaata inay fadhi wada-jir ah ka yeeshaan.

## GOLAHA WAKIILADA

### QODOBKA 39AAD
### TILMAANTA GUUD EE GOLAHA

Golaha Wakiiladu waa xubno ka wakiil ah dadweynaha; waana Qaybta 1aad ee Xeer-dejinta dalka, ansixinta xeerarka, oggolaanshaha iyo ilaalinta siyaasadda guud ee hoggaaminta dalka.

### QODOBKA 40AAD
### TIRADA GOLAHA IYO DOORASHADIISA

Golaha Wakiilada waxa uu ka kooban yahay 82 xubnood oo lagu soo doorto doorasho guud oo toos ah iyo cod-bixin qarsoodi ah oo xor ah.

### QODOBKA 41AAD
### SHURUUDAHA QOFKA ISU-TAAGAYA DOORASHADA

Qofka isu-taagaya xubinimadda Golaha Wakiilada waa in uu yeesho shuruudaha soo socda:-

1. Inuu Muslim yahay, kuna dhaqmaa Diinta Islaamka
2. In uu Muwaadin yahay, da'diisuna ka yaraan shan iyo soddon sano (35 sano).
3. Inuu jidh ahaan iyo caqli ahaanba u gudan karo xilkiisa.
4. Inuu leeyahay aqoon dugsi sare ama wax u dhigma ugu hoosayn.
5. In aanu hore ugu dhicin xukun ciqaabeed oo Kama dambays ah, oo maxkamad horteed kaga caddaaday shantii sanno ee ugu dambaysay.
6. Inuu yahay xil-kas; akhlaaqdiisa iyo dhaqankiisuna toosan yihiin
7. Uma bannaana qof shaqaale Dawladeed ah in uu isu taago doorasho haddaanu muddada xeerku cayimay ka hor shaqo ka tegid codsan; taas oo in laga aqbalaana ay waajib tahay.

### QODOBKA 42AAD
### MUDDADA XILKA IYO XILLIGA DOORASHADA

1. Muddada xilka Golaha Wakiiladu waa 5 (shan) sano oo ka bilaabmaya maalinta Maxkamadda Sare ay ku dhawaaqdo go'aamada doorashada.
2. Madaxweynaha ayaa ku dhawaaqaya doorashada Golaha cusub bil ka hor dhammaadka muddada Golaha hore.
3. Haddii doorashada Golaha Wakiiladu ku qabsoomi weydo duruufo adag awgeed, Golaha hore ayaa xilka sii haynaya inta ay ka dhamaanayso duruuftaasi, lagana dooranayo Gole cusub. Duruufaha adagi waa: dagaal baahsan, xasilooni darro gudaha ah, aafo dabiici ah oo culus sida dhul gariir, cudurrada faafa, abaaro culus; waxaana qiimaynaya kana go'aan gaadhaya Golaha Guurtida ka dib marka Golaha Xukuumaddu sidaa soo jeediyo.

## QODOBKA 43AAD
## XARUNTA GOLAHA WAKIILADA

Xarunta Golaha Wakiiladu waa Magaalo-madaxda.

## QODOBKA 44AAD
## ISU YEEDHIDDA GOLAHA CUSUB

1. Golaha cusub waxa uu qabanayaa fadhigiisa ugu horreeya 30 (soddon) maalmood gudahood oo ka bilaabmaysa maalinta lagu dhawaaqo go'aamada doorashada; waxaana isugu yeedhaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda.
2. Haddii Madaxweynuhu isugu yeedhi waayo, Golaha ayaa u kulmaya iskii maalinta 45aad (Shan iyo afartanaad) laga bilaabo maalinta lagu dhawaaqo go'aamada doorasho.
3. Golaha cusub waxaa furaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare oo dhaarinaya xubnaha. Markaa waxaa guddoominaya shirka xubinta ugu da'da weyn; waxaanu Goluhu iska dhex dooranayaa Guddoomiyaha iyo laba Guddoomiye ku-xigeen.

## QODOBKA 45AAD
## FADHIYADA GOLAHA WAKIILADA

1. Fadhiyada Golaha Wakiiladu waa kuwo furan, kuwo xidhana way noqon karaan; xeer hoosaad baana nidaaminaya.
2. Fadhiga Golaha Wakiiladu waxa uu ku furmi karaa marka ay joogaan kala badh in ka badani, marka laga reebo kuraasida bannaanshahooda la baahiyay.
3. Go'aamada Golaha waxa ay ku ansaxayaan hal dheeri xubnaha jooga fadhiga (aqlabiyad fudud), marka laga reebo xaaladaha Dastuurku ama Xeer-hoosaadka Goluhu uu u jideeyo aqlabiyad kale.
4. Dib-u-dhigid fadhi wuxuu ku ansaxayaa aqlabiyad fudud (hal dheeri). Waxaana dib loo dhigi karaa ugu badnaan toddoba (7) maalmood.
5. Wasiirada iyo Wasiir-ku-xigeennada waxa ku waajib ah in ay ka qayb galaan fadhiyada Golaha Wakiilada iyo Guddiyadiisa haddii qoraal lagaga codsado sidaa; waxaanay xaq u leeyihiin in ay ka qayb qaataan doodda; hase yeeshee xaq uma laha codayn. Sidoo kale Madaxweynaha waxaa u bannaan in uu u wakiisho Ku-xigeenka Madaxweynaha ama Wasiir kasta ka qayb-galka fadhiyada Golaha Wakiilada.

## QODOBKA 46AAD
## KAL-FADHIYADA IYO HABAYNTA GOLAHA WAKIILADA

1. Waxa Goluhu yeelanayaa 3 (Saddex) kal-fadhi oo caadi ah sannadkiiba oo qaadanaya muddo 28 (siddeed iyo labaatan) toddobaad ah. Labadii kal-fadhi waxaa u dhaxaynaya ugu yaraan 4 (afar) toddobaad, ugu badnaana 8 (siddeed) toddobaad.
2. Kal-fadhiga aan caadiga ahayn ee Golaha Wakiilada waxa uu ku qabsoomi karaa:

    b) Codsi ka yimid Madaxweynaha;

    t) Guddoomiyaha Golaha Wakiilada oo isugu yeedha;

    j) 1/3 (saddex-meelood, meel) tirada xubnaha Golaha Wakiilada oo qoraal ku codsada.

3. Kal-fadhigiisa ugu horreeya waxa Golaha Wakiiladu ku ansixinayaa xeer-hoosaadkiisa; waxaanu ku dhisanayaa guddi-hoosaadyo inta uu u baahdo.
4. Khudbadda Qaranka waxa jeedinaya Madaxweynaha kal-fadhiga u horreeya sannad walba, waxayna ka war bixinaysaa: siyaasadda, barnaamijyada Dawladda, dhaqaalaha, xaaladda lacageed & xaaladda nabadgelyada.

**QODOBKA 47AAD**
**MUSHAHARKA IYO GUNNADA GOLAHA WAKIILADA**

Xubnaha Golaha Wakiiladu waxay yeelanayaan mushahar iyo gunno xeer qeexo.

**QODOBKA 48AAD**
**REEBBANAANTA QABASHADA XIL KALE IYO UGA FAA'IIDEYSIGA XILKA DANO GAAR AH**

Xubinta Golaha Wakiilada uma bannaana in ay qabato xil kale oo Dawladeed, iyadoo xilkii loo doortay haysa; umana bannaana in ay uga faa'iideysato xilkaasi dano gaar ahaaneed.

**QODOBKA 49AAD**
**DHAWRSANAANTA XUBINTA GOLAHA WAKIILADA**

1. Xubinta Golaha Wakiilada loo qaban maayo, waxna loogu qaadi maayo arrin uu ogaaday ama uu Golaha soo hor-dhigay ama arrimo uu ra'yi ka dhiibay.
2. Waxaa ka reebban xukunkaas faqradda 1aad wixii cay ama aflagaado ah ee xubintu geysato.
3. Ma bannaana in laga qaado xubinta Golaha Wakiilada tallaabo baadhitaan ama waraysi ama qabasho ama xidhitaan ama tallaabo kale oo ciqaab la xidhiidha iyadoo oggolaansho looga helo Golaha Wakiilada mooyaane.
4. Waxa xubinta tallaabo laga qaadi karaa haddii lagu qabto isagoo dembi faraha kula jira; markaana waxa waajib ah in Golaha si deg-deg ah loo ogeysiiyo.

5. Golaha waxa ku waajib ah in uu hubiyo in tallaabada laga qaaday xubinta ay tahay mid toosan.
6. Haddii aanu Goluhu fadhiyin, waxa waajib ah in oggolaanshaha tallaabada laga qaadayo xubinta laga helo Guddida Joogtada ah ee Golaha Wakiilada; Golahana waxa la soo hor-dhigayaa kal-fadhiga xiga.
7. Dacwadaha aan ciqaabta ahayn waa lagu oogi karaa xubinta Golaha Wakiilada iyadoo aan oggolaanshaha Golaha Wakiilada loo baahnayn.

## QODOBKA 50AAD
## WAAYIDDA XUBINIMADA GOLAHA WAKIILADA

Xubinimada Golaha Wakiilada waxa la waayi karaa haddii:-

1. Xubintu geeriyooto ama uu ku yimaado xanuun suurto gelin waaya gudashada xilkeeda.
2. Xubintu istiqaalad dhiibto, iskeedna shaqada uga tagto; Goluhuna ka oggolaado;
3. Uu jabo shardi ka mid ah shuruudihii lagu soo doortay; ama uu gudan waayo xilkiisa;
4. Uu ku dhaco xukun ciqaabeed kama dambays ah oo maxkamad horteed kaga caddaaday;
5. Uu ka maqnaado Golaha 20 (labaatan) fadhi oo isku xiga idin la'aan.

## QODOBKA 51AAD
## BUUXINTA JAGADA GOLAHA WAKIILADA

Haddii ay bannaanaato jagada xubin ka mid ah Golaha Wakiilada ka hor lixda bilood ee ugu dambaysa muddada xilka Golaha, waxa loo soo buuxinayaa si waafaqsan xeerka, iyadoo xubinta cusubi ay dhamaystirayso muddada xilka Golaha ka hadhay.

## QODOBKA 52AAD
## SHAQAALAHA GOLAHA WAKIILADA

1. Golaha Wakiiladu wuxuu yeelanayaa Xoghayn uu madax ka yahay Xoghaye Guud oo aan ka tirsanayn Golaha Wakiilada; kana kaalmaynaya Shir-

guddoonka Golaha hawlaha xafiiska, dhammaan arrimaha maaliyadda iyo maamulka, wuxuuna yeelanayaa Ku-xigeen.

2. Golaha Wakiiladu wuxuu yeelanayaa lataliyeyaal sida Lataliye-sharci, dhaqaale, siyaasadeed iwm oo lagu xusho khibrad iyo aqoon ay u leeyihiin hawlahooda.
3. Shaqaalaha kale ee Xoghaynta waxa shaqo gelinaya Xoghayaha Guud marka uu ka helo oggolaansho Shir-guddoonka. Xoghayaha Guud; Ku-xigeenka, Lataliyayaasha iyo shaqaalaha kale magacaabistooda, xil ka qaadistooda, gunnadooda iyo xuquuqdooda, waxa lagu caddaynayaa xeer-hoosaadka Golayaasha.

## QODOBKA 53AAD
## AWOODDA IYO WAAJIBAADKA GOLAHA WAKIILADA

1. Waxa waajib ah inuu oggolaansho Golaha Wakiilada ka helo qof kasta oo loo magacaabo Wasiir, Wasiir-ku-xigeen iyo Madaxda Hay'adaha Dawladda, iyadoo la raacayo Dastuurka.
2. Golaha Wakiiladu waxa kale oo uu awood u leeyahay ka doodista, wax ka sheegista, celinta oo sababaysan iyo ansixinta Barnaamijka Xukuumadda.
3. Golaha Wakiiladu waxa uu ansixinayaa heshiisyada dawliga ah ee ay ka mid yihiin kuwa siyaasadeed, dhaqaale iyo nabadgelyo ama kuwa keenaya culays maaliyadeed oo cusub oo aan ku soo aroorin miisaaniyadda, ama keenaya soo-saarid ama wax-ka-beddelid qaanuun.
4. Golaha Wakiiladu waxa uu u gudbinayaa Golaha Xukuumadda tallooyin iyo tilmaamo ku saabsan siyaasadda guud ee hogaaminta.
5. Ku-soo rogida dalka, ama qayb ka mid ah xukun deg-deg ah waxa Golaha Xukuumaddu uu waydiisanayaa labada Gole (**Golaha Wakiilada & Golaha Guurtida**) oggolaansho.
6. Golaha Wakiiladu waxa uu awood u leeyahay in uu u yeedho Xukuumadda ama hay'adaheeda iyo wakaaladaheeda, si uu wax uga waydiiyo gudashada xilkooda.

7. Guddiyada Golaha Wakiiladu waxay awood u leeyihiin in ay Wasiirka ama madaxda hay'adaha Dawladda ama madaxda sare ee kale ee Qaranka ee hawshoodu khusayso, in ay wax ka waydiiyaan gudashada xilkooda.

## QODOBKA 54AAD
## AWOODDA XEER-DEJINTA EE GOLUHU WAA IN AY GAADHSIISNAATAA ARRIMAHA MAALIYADDA EE SOO SOCDA:-

1. Jideynta cashuuraha, takaaliifta, iyo tallaabooyin kale oo kor loogu qaadayo dakhliga.
2. Asaasidda kaydka dakhliga Somaliland ama kaydad kale oo loo qoondeeyey xaalado gaar ah. Habka loo maamulaayo, loogu ururinayo iyo looga bixinayo xeer ayaa nidaaminaya.
3. In la daabaco lacag, lana soo saaro shahaadooyin rahmadeed, iyo kuwa kale oo leh qiimo dammaanadeed.
4. Habaynta nidaamyada dhaqaale iyo kuwa lacageedba.

## QODOBKA 55AAD
## MIISAANIYADDA

1. Golaha Wakiiladu waxa uu ka doodi karaa, waxna ka beddeli karaa miisaaniyadda, kuna ansixinayaa go'aan Gole.
2. Haddii ansixinta miisaaniyadda cusubi dhammaan weydo ka hor bilowga sannad-maaliyadeedka cusub, waxa lagu dhaqmayaa miisaaniyaddii hore inta ay ka soo baxayso miisaaniyadda cusubi.
3. Golaha Wakiilada ayaa oggolaanaya gelidda kharash kasta oo aan miisaaniyadda ku jirin.
4. Xeer ayaa caddaynaya habka soo diyaarinta miisaaniyadda guud iyo sannad-maaliyadeedka.
5. Xeer ayaa caddaynaya miisaaniyadda iyo xisaab-xidhka hay'adaha, wakaaladaha iyo shariikadaha dawladeed ama kuwa ay wax ku leedahay iyo u soo bandhigidooda Golaha Wakiilada.

6. Waa waajib u soo bandhigidda Golaha Wakiilada xisaab-xidhka sannad-maaliyadeedkii dhammaaday muddo aan ka badnayn lix bilood oo ka bilaabanta taariikhda dhammaadka sannad-maaliyadeedka, iyadoo Golaha Wakiiladu ka doodayo, go'aanna ka soo saarayaan.
7. U soo bandhigidda xisaab-xidhka miisaaniyadda waxa u xilsaaran Hanti-ldhawraha Guud.

**QODOBKA 56AAD**
**KALA DIRIDDA GOLAHA WAKIILADA**

Golaha Wakiilada waxa la kala diri karaa:-

1. Marka uu fadhiisan waayo laba kal-fadhi oo caadiya oo isku xiga, iyadoo aanay keenin duruuf awoodooda ka baxsani.
2. Marka ay soo jeediyaan inuu kala dirmo 1/3 (saddex meelood, hal) tirada xubnaha Goluhu; iskuna raacaan 2/3 (saddex meelood laba) tirada guud ee xubinihiisa.
3. Xaaladaha ku xusan faqradaha (1) iyo (2) ee qodobkan waxa go'aan ka soo saaraysa Maxkamadda Dastuurka, iyadoo xaaladda ku xusan faqradda (1aad) ay Maxkamaddu u soo gudbinayso Madaxweynaha xaaladda ku xusan faqradda 2aadna Golaha Wakiilada.
4. Golaha Wakiilada waxa kale oo kala diri kara Madaxweynaha, ka dib marka uu dadweynuhu sababaha uu ku dhisay kala diridooda ku oggolaado Afti-qaran oo ay qaban-qaabiso Maxkamadda Dastuuriga ahi.
5. Madaxweynuhu marka uu arko go'aanka Maxkamada Dastuuriga ee ay ka soo saarto xaaladda ku xusan faqradda (1) ama (2) ee qodobkan, ama natiijada aftida dadweynaha ee ku xusan faqradda (4) ee qodobkan, waxa uu ku soo saarayaa Xeer-Madaxweyne kala diridda Golaha Wakiilada, isaga oo isla markaa baahinaya taariikhda doorashada Golaha cusub oo ku qabsoomaya 60 (lixdan) maalmood gudahood.

6. Haddii aftida Qaranku taageeri weydo kala diridda Golaha Wakiilada, ama doorashadu qabsoomi waydo, Golihii hore ayaa xilka haynaya.
7. Ma bannaana kala diridda Golaha Wakiilada sannadka u horreeya ee Golaha iyo sannadka u dambeeya ee muddada xilka Madaxweynaha.

## XUBINTA 2AAD
## GOLAHA GUURTIDA

### QODOBKA 57AAD
### TILMAANTA GUUD EE GOLAHA

Golaha Guurtida Jamhuuriyadda Somaliland, oo ah Golaha Odayaasha, waa Qaybta 2aad ee Xeer-dejinta waxaanay dib u eegaan xeerarka ka soo baxa Golaha Wakiilada intaan Madaxweynaha loo gudbin; wuxuuna gaar u leeyahay dejinta xeerarka ku saabsan Diinta, dhaqanka iyo nabadgelyada.

### QODOBKA 58AAD
### DOORASHADA XUBNAHA GOLAHA GUURTIDA IYO MUDDADA XILKA

1. Xubnaha Golaha Guurtida waxa lagu soo dooranayaa doorasho, habka doorashadana waxa nidaaminaya xeer.
2. Muddada xilka Golaha Guurtidu waa 6 (lix sano), oo ka bilaabmaysa maalinta fadhiga 1aad qabsoomi.

### QODOBKA 59AAD
### SHURUUDAHA QOFKA LOO SOO DOORANAYO XUBINIMADA GOLAHA GUURTIDA

Qofka loo soo dooranayo xubinimada Golaha Guurtida waa in uu yeesho shuruudaha qofka isu-taagaya xubinimada Golaha Wakiilada marka laga reebo da'da iyo heerka aqoonta oo noqonaya sidan hoos ku xusan:-

1. Inaan da'diisu ka yaraan 45 sano (shan iyo afartan sano).

2. Inuu yahay qof Diinta aqoon fiican u leh, ama oday dhaqan-yaqaan ah.

## QODOBKA 60AAD
## TIRADA GOLAHA GUURTIDA

1. Tirada xubnaha Golaha Guurtidu waa 82 (**laba iyo siddeetan**) oo iska dhex dooranaya Guddoomiye, laba Guddoomiye-ku-xigeen iyo guddi hoosaadyo inta uu u baahdo. Goluhu wuxuu yeelanayaa guddi joogto ah oo 25 (shan iyo labaatan) xubnood ah.
2. Xilli kasta waxa ku soo kordhaya tiro xubno sharaf ah oo kala ah:-

   b- Shan xubnood oo Madaxweynuhu ku soo xulo tilmaamo gaar ah oo ay Qaranka u yeesheen; waxayna muddada xubinimadoodu la cimri tahay muddada xilka Golaha.

   t- Qof kasta oo horay Guddoomiye uga noqday Golaha Guurtida ama Golaha Wakiilada.

   j- Qof kasta oo hore Jamhuuriyadda Somaliland uga soo qabtay xilka Madaxweyne ama Madaxweyne-ku-xigeen.

   x- Xubno sharafku Golaha cod kuma leh; mana geli karaan Guddida Joogtada ah.

## QODOBKA 61AAD
## AWOODA IYO WAAJIBAADKA GOLAHA GUURTIDA

1. Dejinta xeerarka ku saabsan Diinta, dhaqanka iyo nabadgelyada.
2. Dib-u-eegidda xeerarka Golaha Wakiiladu ansixiyo xeerka maaliyadda mooyaane, waxaanu ku celin karaa Golaha Wakiilada hal mar, muddo 30 (soddon) maalmood gudahood oo ka bilaabanta maalinta loo soo gudbiyo xafiiska Shir-guddoonka Golaha Guurtida, isagoo sababaha aragtidiisa qoraal ahaan ugu gudbinaya.
3. Ka-talo-bixinta dhalliilaha maamul ee Xukuumadda iyo ogaysiintooda Golaha Wakiilada.

4. Ka-gacan-siinta Xukuumadda arrimaha la xidhiidha Diinta, nabadgelyada, difaaca, dhaqanka, dhaqaalaha iyo bulshada; iyagoo kaashanaya madax-dhaqameedka beelaha.
5. U yeedhidda xubnaha Xukuumadda iyo wax-ka-weydiinta gudashada xilkooda.
6. Waxa kaloo Golaha Guurtidu awood u leeyahay in uu Golaha Wakiilada u gudbiyo soo jeedin mashruuc, si Golaha Wakiiladu uga doodo, go'aana uga gaadho.

**QODOBKA 62AAD**
**FADHIGA UGU HORREEYA EE GOLAHA GUURTIDA**

Fadhiga ugu horreeya ee Golaha Guurtidu wuxuu qabsoomayaa 30 maalmood gudahood ka dib maalinta la soo dhamaystiro xulashadiisa; waxaana fadhiga furaya xubnahana dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare; waxana shirkaas guddoominaya xubinta ugu da'da weyn inta laga dooranayo Guddoomiye rasmi ah iyo labadiisa Ku-xigeen.

**QODOBKA 63AAD**
**XOGHAYAHA GOLAHA IYO LA-TALIYAYAAL**

Golaha Guurtidu waxa uu yeelanayaa Xoghaye aan xubin ka ahayn Golaha. Waxa kale oo uu yeelan karaa la-taliyayaal uu ka mid yahay La-taliye Sharci. Dhismaha xoghaynta Golaha Guurtida waxay la mid tahay ta Golaha Wakiilada.

**QODOBKA 64AAD**
**XEER-HOOSAADKA GOLAHA**

Kal-fadhigiisa ugu horreeya Golaha Guurtida waxa uu ku ansixinayaa xeer hoosaadka Golaha.

**QODOBKA 65AAD**
**MUSHAHARKA IYO GUNNADA GOLAHA GUURTIDA**

Xubnaha Golaha Guurtida waxay yeelanayaan mushahar iyo gunno xeer qeexo.

## QODOBKA 66AAD
## DHAWR-SANAANTA XUBINTA GOLAHA GUURTIDA

Dhawrsanaanta xubinta Golaha Guurtidu waxa ay la mid tahay ta xubinta Golaha Wakiilada iyadoo dhawrsanaan-ka-qaadista uu leeyahay Golaha Guurtidu.

## QODOBKA 67AAD
## SHAQO-KA-TEGIDDA XUBINTA GOLAHA GUURTIDA

Xubinta Golaha Guurtidu waxa ay u gudbin kartaa shaqo-ka-tegideeda Golaha Guurtida, isagaana ka oggolaanaya.

## QODOBKA 68AAD
## WAAYIDDA XUBINIMADA GOLAHA GUURTIDA

1. Xubinta Golaha Guurtidu waxa ay waayi kartaa xubinnimadeeda haddii ay burto shuruud ka mid ah shuruudihii lagu soo xushay, ama ay gudan waydo xilka sida uu u caddaynayo xeer-hoosaadka Golaha Guurtidu.
2. Haddii uu ku dhaco xukun ciqaabeed oo kama dambays ah oo maxkamad horteed kaga caddaaday.
3. Haddii Goluhu ka aqbalo istiqaalad.

## QODOBKA 69AAD
## KALA DIRIDDA GOLAHA

Golaha Guurtida waxa loo kala diri karaa habka loo kala diri karo Golaha Wakiilada.

## QODOBKA 70AAD
## REEBBANAANTA QABASHO XIL KALE IYO UGA FAA'IIDAYSIGA XILKA DANO GAAR AH

Xubinta Golaha Guurtida uma bannaana in ay qabato xil kale oo Qaran iyadoo xilkii loo xulay haysa; umana

bannaana in ay xilka uga faa'iidaysato dano gaar ahaaneed.

### QODOBKA 71AAD
### FADHIYADA IYO KAL-FADHIYADA

Fadhiyada Golaha Guurtida waa kuwa furan, waxaana ay noqon karaan kuwa xidhan sida ku cad Dastuurka. Tirada ay fadhiyadu ku furmi karaan aqlabiyadda ay go'aamadiisu ku ansaxayaan iyo cidda isugu yeedhi kara kal-fadhiyada aan caadi ahayn, waxay la mid yihiin habka Golaha Wakiilada.

### QODOBKA 72AAD
### BANNAANSHAHA JAGADA GOLAHA GUURTIDA IYO SOO-BUUXINTEEDA

1. Jagada Golaha Guurtidu waxay ku bannaanaanaysaa haddii ay timaado xaalad ka mid ah xaaladaha ku tilmaaman qodobka 50aad.
2. Haddii ay bannaanto xubin ka mid ah Golaha Guurtidu ka hor lixda bilood ee ugu dambeeya muddada xilka Golaha Guurtida, waxa loo soo buuxinayaa si waafaqsan xeerka, iyadoo xubinta cusubi ay dhammaystirayso muddada xilka Golaha.

### QODOBKA 73AAD
### XARUNTA GOLAHA GUURTIDA

Xarunta Golaha Guurtidu waa Magaalo-madaxda.

### QODOBKA 74AAD
### SOO BANDHIGIDDA MASHRUUC-SHARCI

Mashruuc-sharci waxa Golaha Wakiilada u soo bandhigi kara:-

1. Golaha Xukuumadda
2. Tirada Xubnaha Golaha Wakiilada ee xeer-hoosaadka Goluhu qeexo.

3. Muwaadiniin leh xaqa cod-bixinta, tiradooduna aanay ka yarayn 5000 (shan kun) oo qof, waxaana ka reebban mashruuc qaanuun-maaliyadeed.

**QODOBKA 75AAD**
**SOO-SAARIDDA, FAAFINTA IYO DHAQAN-GELINTA XEERKA**

Xeerarka waxa uu Madaxweynuhu ku soo saarayaa, kuna baahinayaa faafinta rasmiga ah saddex toddobaad (**21 maalmood**) gudahood laga bilaabo maalinta Golayaashu u soo gudbiyaan; waxayna ku dhaqan-gelayaan 30 (soddon) maalmood gudahood oo laga bilaabo maalinta la baahiyay, iyada oo ay bannaan tahay in muddada dhaqan-galka lagu gaabiyo ama lagu dheereeyo xeerka gudihiisa.

**QODOBKA 76AAD**

Mashruuc-sharci waxa uu xeer ku noqonayaa ansixinta Golaha Wakiilada; waxaanu dhaqan gelayaa ka dib marka uu Madaxweynuhu saxeexo sida ku cad Qod. 38aad.

**QODOBKA 77AAD**
**HABKA LOO RAACO XEER-DEJINTA**

1. Labada Gole ee Baarlamaanka mid waliba mashruuc-sharci uu ansixiyo wuxuu u gudbinayaa Golaha kale; si uu ula eego tallooyinna uga siiyo.
2. Labada Gole mid waliba Golaha kale hal mar oo keliya ayuu mashruuc-sharci ku soo celin karaa.
3. Xeer-hoosaadka Baarlamaanka ayaa qeexaya hab-socodka mashruuc-sharci, waana in uu muujiyaa mudnaanta gaar ah ee ay leeyihiin mashruuc-sharciyada la xidhiidha maaliyadda iyo kuwa Xukuumaddu u aragto degdeg, kuwaas oo mudan in iyaga la hormariyo.
4. Mashruuc-sharci ay labada Gole ee Baarlamaanku ku wada ansixiyeen ama ku wada oggolaadeen aqlabiyadda $^{2}/_{3}$ (saddex meelood, laba) ama ka badan Madaxweynuhu dib uma celin karo ee wuu

saxeexayaa. Haddii uu arko in mashruuc-sharcigaasi ka hor imanayo qodob ama qodobo Dastuurka, waa in uu sidaa ku wargeliyaa Shir-guddoonka iyo Xeer-ilaaliyaha Guud oo u gudbin doona Maxkamadda Dastuuriga ah.

5. Madaxweynuhu mashruuc-sharci looga soo gudbiyey Baarlamaanka, wuxuu ku saxeexayaa saddex toddobaad (**21 maalmood**) gudahood, laga bilaabo taariikhda mashruucaas-sharci soo gaadhay xafiiska Madaxweynaha haddii aanu Baarlamaanka dib ugu soo celin.
6. Haddii Madaxweynuhu mashruuc-sharci uu u soo gudbiyay Baarlamaanku ku saxeexi waayo muddadaas la gooyey ama ku soo celin waayo Baarlamaanka, mashruuc-sharcigaasi si toos ah ayuu u noqonayaa xeer; waxaana soo saaraya Golaha soo gudbiyay.

**QODOBKA 78AAD**

1. Mashruuc-sharci kasta aan ahayn kuwa maaliyadda oo Golaha Wakiiladu aqlabiyad ku oggolaado waa in loo gudbiyo Golaha Guurtida, kaas oo markaas:-

   b- Oggolaan kara ama wax-ka-beddel soo jeedin kara

   t- Haddii Golaha Guurtidu oggolaan waayo, ama wax-ka-beddelid uu soo jeediyay Golaha Wakiiladu ku qanci waayo, Golaha Wakiiladu wuxuu xaq u leeyahay in mashruuca-sharciga kal-fadhiga xiga ee Golaha Guurtida dib ugu celiyo. Haddii uu Golaha Guurtidu oggolaan waayo ama ku soo jawaabi waayo bil gudaheed, mashruuc-sharcigu wuu ansaxaya, sidaas ayaana Madaxweynaha loogu gudbinayaa.

2. Mashruuc-sharci kasta oo Golaha Guurtidu aqlabiyad ku ogolaaday waa in loo gudbiyo Golaha Wakiilada, kaas oo markaa:-

   b- Oggolaan kara ama wax ka beddelid soo jeedin kara

t- Haddii Golaha Wakiiladu mashruuc-sharcigaas oggolaan waayo, ku noqosho malaha.

3. Mashruuc-sharci labada Gole soo oggolaadeen ee loo gudbiyey Madaxweynaha, haddii uu sidaa ku oggolaado, wuxuu Madaxweynuhu ku soo saarayaa faafinta rasmiga ah (21) maalmood gudahood. Haddii uu Madaxweynuhu oggolaan waayo ama wax-ka-beddelid soo jeediyo waa in uu kow iyo labaatan (21) maalmood gudahood ku soo wargeliyaa Shir-guddoonka Golaha Wakiilada sababta uu u cuskaday.
4. Haddii uu sababaha uu Madaxweynuhu cuskaday Goluhu ku qanci waayo, oo mashruuc-sharcigaas uu mar-labaad ku ansixiyo aqlabiyad $^{2}/_{3}$ (saddex meelood, laba) xubnaha Golaha, mashruuc-sharcigaas waa inuu Madaxweynuhu aqbalaa. Haddiise aqlabiyadu intaas ka yaraato, mashruuc sharcigaasi wuu burayaa.
5. Mashruuc-sharci uu Golaha Wakiiladu oggolaado aan ahayn mashruuc-sharci maaliyadeed oo Golaha Guurtidu nuxurkiisa (Principle) ku diido aqlabiyad (2/3) (saddex meelood laba) xubnaha Golaha, haddii Golaha Wakiiladu ku qanci waayo diidmadaasi oo mar labaad ku ansixiyo aqlabiyad ka yar 2/3 (saddex-meelood laba) xubnaha Golaha, mashruuca-sharcigaasi wuu burayaa.

## QODOBKA 79AAD
## EEDAYNTA XUBNAHA GOLAYAASHA

1. Xubnaha Golayaasha (**Wakiilada iyo Guurtida**) waxa lagu oogi karaa dacwad dembi ah haddii la qabto xubinta ama xubnaha iyagoo faraha kula jira fal-dembiyeed (**Flagrante Delicto**), dambigaas oo ciqaabtiisa ugu yari tahay saddex (3) sano oo xadhig ah.

Hase yeeshee, lama hor geyn karo maxkamad, loomana gudbin karo xabsi, ilaa xubinta ama xubnaha laga xayuubiyo dhawr-sanaanta xilka ay ummadda u hayaan.

2. Dacwadda dembiga ah ee lagu eedaynayo xubnaha Golayaasha waxa soo oogaya Xeer-ilaaliyaha Guud, ka bacdi marka Golaha xubintu ama xubnuhu ka tirsanaayeen ay maamuuska kaga xayuubiyaan saddex meelood laba ahaan tirada guud ee Golaha.

Waxa dacwaddaas dhegeysigeeda awood u leh Maxkamadda Sare ee Cadaaladda (High court of Justice).

# QAYBTA SADDEXAAD

## WAAXDA FULINTA

## XUBINTA 1AAD

### QODOBKA 80AAD
### MADAXWEYNAHA IYO MADAXWEYNE-KU-XIGEENKA

Qaranku wuxuu yeelanayaa Waaxda Fulinta, oo ka gaar ah kana madax-bannaan waaxyaha Xeer-dejinta iyo Garsoorka.

### QODOBKA 81AAD
### WAAXDA FULINTA

Waaxda Fulinta (oo mararka qaarkood loogu yeedho **Xukuumadda**) waxa madax ka ah Madaxweynaha, waxaanay ka kooban tahay:-

- Madaxweyne;
- Madaxweyne-ku-xigeen
- Iyo Golaha Wasiirada ee Madaxweynuhu magacaabo.

### QODOBKA 82AAD
### SHURUUDAHA QOFKA LOO DOORANAYO MADAXWEYNE AMA MADAXWEYNE-KU-XIGEEN

Waxa Madaxweyne ama Ku-xigeen Madaxweyne loo dooran karaa qofka buuxiya shuruudaha soo socda:-

1. Waa inuu yahay muwaadin u dhashay Somaliland oo muwaadinimo dawlad kale haysan, balse wuu noqon karaa qoxooti dal kale deggan.
2. Waa inuu Muslim yahay, kuna dhaqmaa Diinta Islaamka
3. Waa inaanay da'diisu ka yaraan afartan sano (40)
4. Waa inuu jidh ahaan iyo maskax ahaanba gudan karaa xilkiisa
5. Waa inuu aqoon iyo waayo-aragnimo u leeyahay arrimaha maamulka (mid dawliya iyo mid kaleba)
6. Waa inuusan dembi maxkamadi ku xukuntay ka gelin Qaranka Somaliland
7. Waa inuu xaaskiisu yahay Muslim
8. Waa inuu xog-ogaal u ahaado xaqaa'iqa dalka ka jira, isaga oo joogay ugu yaraan laba sano ka hor taariikhda doorashada loo cayimay in ay qabsoonto.
9. Waa inuu hantidiisa diiwaan geliyo.

## QODOBKA 83AAD
## HABKA DOORASHADA

1. Waxa Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha lagu dooranayaa qaabka doorashada guud oo toos ah; isla markaana qarsoodi ah iyaga oo isku lammaan.
2. Doorashada Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha, oo isku mar loo codaynayo, kuna salaysan habka u codaynta liistada, waxa la qaban doonaa bil ka hor dhammaadka muddada xilka Madaxweynaha hore.
3. Madaxweynaha iyo Madaxweyne-ku-xigeenka hore ayaa sii wadi doona hawlaha ay u xil-saarnaayeen ilaa Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka cusubi kala wareegaan xilka muddo bil ah gudaheed.
4. Waxa loo aqoonsanayaa in ay doorashada Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynuhu ku guulaysteen labada qof ee magacyadoodu ku sheegan yihiin liistada hesha codadka ugu tirada badan.
5. Haddii ay suurtoobi weydo duruufo la xidhiidha nabadgelyada darteed in la qabto doorashada Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha marka muddadii xilkoodu dhammaato, waxa Golaha

Guurtida waajib ku ah in ay muddada xilka u kordhiyaan Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha, iyaga oo tixgelinaya muddada dhibaatada lagaga gudbi karo, doorashaduna ku qabsoomi karto.

## QODOBKA 84AAD
## DHAARTA MADAXWEYNAHA IYO KU-XIGEENKA MADAXWEYNAHA

Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha waxa lagu dhaarinayaa ka hor intaanay xilka la wareegin xaflad ay goob joog ka yihiin Madaxda Golayaasha Wakiilada iyo Guurtida iyo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.

## QODOBKA 85AAD
## WAXYAABAHA KA REEBBAN MADAXWEYNAHA IYO MADAXWEYNE-KU-XIGEENKA

1. Uma bannaana Madaxweynaha iyo Madaxweyne-ku-xigeenka iyo Marwooyinkoodu in ay galaan ganacsi muddada ay xilka hayaan.
2. Madaxweynuhu dalka kama maqnaan karo (45) cisho oo isku xiga muddo ka badan sabab caafimaad mooyaane.
3. Hadiyadaha la siiyo Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha iyo Marwooyinkooda iyo Madaxda sare ee Qaranka ee leh muuqaal Qaran iyada oo lagu maamuusayo xilka ay hayaan waxa weeye hanti Qaran.

## QODOBKA 86AAD
## BANNAANAANTA JAGADA IYO HABKA UU MADAXWEYNUHU AMA MADAXWEYNE-KU-XIGEENKU XILKA UGA TEGI KARO

Waxay jagada Madaxweynaha ama Ku-xigeenka Madaxweynuhu bannaanaan kartaa haddii ay dhacdo xaalad ka mid ah xaaladaha hoos ku sheegan:-

1. Xukun dembi ah oo xilka lagaga xayuubiyay.
2. Hawsha oo uu caafimaad darro darteed u gudan kari waayo.
3. Geeri ku timaadda.
4. Is-casilaadda Madaxweynaha ama Madaxweyne Ku-xigeenku wuxuu qoraal xil-ka-tegis ah u gudbinayaa Guddoomiyaha Golaha Wakiilada iyo Guddoomiyaha Golaha Guurtida, waxayna labada Gole fadhi wadajir ah ku oggolaan karaan ama ku diidi karaan aqlabiyad tirada guud ee labada Gole.
5. Haddii ay Golayaashu diidaan codsiga xil-ka-tegidda ee ku sheegan faqradda 4aad ee qodobkan waxaa Madaxweynaha ama Madaxweyne-ku-xigeenku xaq u yeelanayaa in uu mar labaad keensado codsi dalab xil-ka-tegis ah muddo aan ka badnayn saddex bilood markii uu codsiga hore qortay; waxaana waajib ku ah labada Gole in ay xil-ka-tegidda ka oggolaadaan.

## QODOBKA 87AAD
## MUSHAHARKA IYO GUNNADA

Mushaharka, gunnada iyo hantida Dawladda ee ay Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynuhu ku dhaqmaan waxa qeexaya xeer.

## QODOBKA 88AAD
## MUDDADA XILKA

1. Muddada xilka ee Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha waa 5 sano oo ka bilaabanta maalinta xilka loo dhaariyo.
2. Qofna jagada Madaxweynaha ma qaban karo laba jeer wax ka badan.

## QODOBKA 89AAD
## HABKA BUUXINTA JAGADA BANNAANAATAY

1. Haddii mid ka mid ah xaaladaha ku sheegan qodobka 86aad ay ku timaado Madaxweynaha saddexda sano ee u horreeya shanta sano ee xilka loo doortay, waxa Madaxweyne Ku-xigeenku noqonayaa Madaxweyne

ku meel gaadh ah, waxaana Madaxweyne lagu dooranayaa muddo lix bilood gudahood ah.

2. Haddii Madaxweynaha xaalad ka mid ah xaaladaha ku sheegan qodobka 86aad ay ku timaado labada sano ee u dambeeya muddada shanta sano ah ee loo doortay, waxa xilka Madaxweynenimo la wareegaya Madaxweyne Ku-xigeenka muddada labada sano ah ee hadhay, wuxuuna Madaxweyne Ku-xigeen u sharrixi doonaa xubin ka tirsan Golaha Wakiilada, waxaana ansixinaya labada Gole oo wada jira. Haddii Golayaashu diidaan mudanaha Madaxweynuhu u magacaabay Madaxweyne Ku-xigeenka, waxa waajib ku ah in uu mudane kale ku magacaabo muddo aan ka badnayn soddon maalmood gudahood oo ka bilaabmaysa taariikhda diidmada Golayaasha.

   Waxa xubintu muddada dastuuriga ah hayn doontaa xilka loo magacaabay; isla markaana waayi doontaa xubinnimadii Golaha Wakiilada.

3. Sidoo kale marka xaalad ka mid ah xaaladaha ku sheegan qodobka 86aad ay ku timaado Madaxweyne-ku-xigeenka wuxuu Madaxweynuhu u magacaabayaa Madaxweyne-ku-xigeen xubin ka tirsan Golaha Wakiilada oo 2da Gole oggolaadeen. Wuxuu mudanaha xilka loo magacaabay hayn doonaa jagadaas muddada xilka ka hadhay, iyada oo ay bannaanaan doonto jagadii Wakiilnimadu. Haddii ay Golayaashu diidaan mudanaha Madaxweynuhu u magacaabay Madaxweyne-ku-xigeenka, waxa waajib ku ah in uu mudane kale ku magacaabo muddo aan ka badnayn 30 maalmood gudahood oo ka bilaabmaysa taariikhda diidmada Golayaasha.
4. Haddii Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha isku hal mar ku timaado xaalad ka mid ah xaaladaha ku sheegan qodobka 86aad, waxa xilka Madaxweynaha si ku meel gaadh ah u haynaya Gudoomiyaha Golaha Guurtida. Waxaana doorashada Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha lagu qaban doonaa muddo lixdan (60)

maalmood gudahood ah, oo ka bilaabmaysa maalinta ay xaaladdu sugnaatay.

# XUBINTA 2AAD
## QODOBKA 90AAD
## AWOODAHA MADAXWEYNAHA

Madaxweynuhu waa madaxa Qaranka iyo Dawladda; waana astaanta midnimada muwaadiniinta ka tirsan Jamhuuriyadda Somaliland. Waxa uu u xilsaaran yahay daryeelka haybadda dalka; ilaalinta nabadgelyada; horumarinta bulshada iyo hab-sami-u-socodsiinta maamulka Dawladda. Si uu u gudan karo xilalka kor ku sheegan, wuxuu Madaxweynuhu leeyahay awoodaha soo socda:-

1. Hoggaaminta siyaasadda guud ee Xukuumadda
2. Magacaabidda iyo xil-ka-wareejinta xubnaha Golaha Wasiirada.
3. Magacaabidda iyo xil-ka-wareejinta madaxda sare ee Dawladda marka uu la tashado Wasiirka ku shaqada leh; isla markaana tixgeliyo Dastuurka iyo xeerarka u gaarka ah. Waxa madaxda sare ee dawladda loola jeedaa:-
   b. Hanti-dhowraha Guud
   t. Guddoomiyaha Baanka-dhexe;
   j. Guddoomiyaha iyo Guddida Hay'adda Shaqaalaha Dawladda;
   x. Xisaabiyaha Guud;
   kh. Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradaha iyo hay'adaha;
   d. Taliyayaasha ciidamada iyo Ku-xigeenadooda;
   r. Danjirayaasha;
   s. Xeer-ilaaliyaha Guud; iyo
   sh. Saraakiisha Sare ee kale oo xeer ka soo baxay Golayaasha Xeer-dejintu awood u siinayo magacaabistooda iyo xil-ka-wareejintooda.
4. Hoggaaminta ciidamada Qaranka maadaama uu yahay Taliyaha Guud (Commander-in-Chief).
5. Oggolaanshaha cafiska iyo saamaxaadda, oo ay ka reebban yihiin qisaasta iyo xuduudda Shareecada

Islaamka; iyo bixinta magangelyada siyaasadeed, ka dib marka uu la tashado hay'adaha ku shaqada leh.

6. Saxeexa heshiisyada caalamiga ah.
7. Ka qayb-gelidda shirarka caalamiga ah, isagoo ka wakiil ah Jamhuuriyadda Somaliland
8. Qaabilaadda diblomaasiyiinta shisheeyaha iyo ka qabashada waraaqaha aqoonsigooda (Credentials).
9. Magacaabidda danjirayaasha u jooga Jamhuuriyadda Somaliland dalalka shisheeyaha ah, ururada caalamiga ah iyo kuwa gobollada adduunka.
10. Bixinta astaamaha xurmo iyo sharaf ee ay ka mid yihiin billadaha.
11. Hoggaaminta xaaladaha dagaalka, isla markaana ku dhawaaqidda xaalad deg-deg ah.
12. Fulinta xeerarka aan Waaxda Garsoorka awoodaheeda hoos iman;
13. Awoodaha kale ee ku xusan Dastuurka iyo xeerarka kale.
14. Madaxweynuhu wuxuu xilkiisa u fulin doonaa si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka u degsan.

## QODOBKA 91AAD
## AWOODAHA MADAXWEYNE-KU-XIGEENKA

Madaxweyne-ku-xigeenka Qaranku wuxuu awood u leeyahay:-

1. Ku-simidda xilka Madaxweynaha marka uu Madaxweynuhu maqan yahay ama uu buko.
2. Gudashada hawlaha uu Madaxweynuhu u igmado.
3. Qabashada xilka Madaxweynenimo marka ay jagadu bannaanaato sababahan dartood:-
   - b. Is-casilaadda (xil-ka-tegid) Madaxweynaha
   - t. Xukun dembi ah oo xilka lagaga xayuubiyey;
   - j. Marka uu hawshii loo doortay u gudan kari waayo caafimaad-darro darteed; iyo
   - x. Geeri ku timaada.

## QODOBKA 92AAD
## AWOODAHA KALE EE MADAXWEYNAHA EE LA XIDHIIDHA XEERARKA DEGDEGGA AH

1. Marka ay soo if-baxaan xaalado gaar ah oo halis gelin kara nabadgelyada dalka; khatar ku noqon kara xeerka iyo nidaamka; khalkhal ku abuuri kara xasilloonida guud, ama kalsoonida dhaqaale, waxa Madaxweynuhu soo saarayaa xeerar deg-deg ah oo lagu joojinayo khataraha kor ku sheegan. Haddii Golayaashu fadhiyaan marka uu xeerarka degdegga ah soo saarayo Madaxweynuhu, waa inuu ugu gudbiyo muddo toddoba (7) maalmood gudahood ah si ay go'aanno uga gaadhan. Haddii aanay Golayaashu fadhiyin waxa Guddoomiyayaashoodu isugu yeedhayaan Golayaasha fadhi aan caadi ahayn muddo 14 maalmood gudahood ah. Xukuumaduna way ku sii dhaqmi kartaa xeerkaas inta ay Golayaashu go'aan ka gaadhayaan.
2. Xeerarka degdegga ah waxay yeelan doonaan awoodda xeerarka ka soo baxa Golayaasha (Wakiilada iyo Guurtida), waxayna dhaqan gelayaan marka uu saxeexo Madaxweynuhu.
3. Waxa xeerarka degdegga ah dib-u-eegid ay 2da Gole ku samayn doonaan saddexdii (3) biloodba hal mar iyaga oo go'aankoodu ku salaysnaan doono codka hal dheeriga ah (Simple Majority).

## QODOBKA 93AAD
## HAB-MAAMUUSKA MADAXDA SARE EE QARANKA

1. Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha ayaa leh hab maamuuska koowaad ee Qaranka.
2. Guddoomiyaha Golaha Guurtida ayaa leh hab-maamuuska ku-xiga.
3. Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ayaa leh hab-maamuuska 3aad ee Qaranka.

## XUBINTA 3AAD

### QODOBKA 94AAD
### GOLAHA WASIIRADA

1. Golaha Wasiiradu waxay Madaxweynaha ka kaalmaynayaan fulinta xilkiisa iyaga oo wadajir u go’aamin doona siyaasadda guud, qorshayaasha iyo barnaamijyada Dawladda.
2. Waxaa Wasiirada iyo Wasiir-ku-xigeennada magacaabi kara ama xilka ka qaadi kara Madaxweynaha; waxaana magacaabiddooda la hor dhigayaa Golaha Wakiilada oo ay fadhigaas joogaan kala badh iyo hal xubnood (Quorum), oo ku oggolaan kara ama ku diidi kara cod hal dheeri ah (Simple Majority) oo gacan taag ah.
3. Soddon (30) maalmood gudahood marka Golaha Wakiiladu ansixiyaan magacaabidda Wasiir ama Wasiir-ku-xigeen, waxa xilka u dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyada oo uu goob joog yahay Madaxweynaha ama Madaxweyne-ku-xigeenka, haddii uu Madaxweynuhu ka maqan yahay dalka ama uu buko.
4. Wasiirada ama Wasiir-ku-xigeenadu ma qaban karaan shaqo kale oo ka baxsan tan Qaranka.
5. Qofna looma magacaabi karo Wasiir ama Wasiir-ku-xigeen haddii aanu buuxin shuruudaha ku xidhan qofka loo dooranayo Golaha Wakiilada.
6. Wasiirka waxa loo xil-saari karaa hal Wasaarad ama in ka badan.
7. Madaxweynaha ayaa guddoomin doona fadhiyada Golaha Wasiirada ee caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn.
8. Lama xidhi karo Wasiir ama Wasiir-ku-xigeen haddii aan lagu qaban isagoo faraha kula jira dembi ciqaabtiisu gaadhayso saddex sano ama aanu Madaxweynuhu ka qaadin dhawrsanaanta, isaga oo ku qancay soo jeedin uu u soo bandhigay Xeer-ilaaliyaha Guud.

## QODOBKA 95AAD
## SII-HAYNTA XILKA

1. Wasiirka ama Wasiir-ku-xigeenka istiqaalad dhiiba ama xilka laga fadhiisiyo isaga ayaa xilka sii haynaya inta beddelkiisu ka tirsanayo.
2. Waxaa ka reebban muddada uu Wasiirku ama Wasiir-ku-xigeenku sugayo in xilka laga tiriyo in uu cid xil u magacaabo ama heshiis magaca Wasaaradda cid kale kula galo.

## QODOBKA 96AAD
## EEDEYNTA IYO MAAMUUS-KA-XAYUUBINTA MADAXWEYNAHA, KU-XIGEENKA MADAXWEYNAHA IYO WASIIRADA

1. Haddii Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha lagu soo oogo dembiyada kala ah:-

b. Khiyaamo Qaran (**High Treason**) ama

t. Ku xad gudub Dastuurka

Waxa ku soo oogi kara Madaxweynaha ama/iyo Madaxweyne-ku-xigeenka dembiyada ku xusan faqradan ugu yaraan saddex meelood meel xubnaha ka tirsan Golaha Wakiilada; iyaga oo eedaynta u gudbin doona Guddoomiyaha Golaha Wakiilada, Golaha Wakiiladuna waxuu ku ansixin karaa cod tirada xubnaha Wakiilada badhkood iyo mid ah (**Absolute Majority**).

2. Golaha Wakiiladu wuxuu igmanayaa guddi aan ka badnayn toban (10) xubnood oo eedeynta Madaxweynaha iyo Madaxweyne-ku-xigeenka kaga oogta Golaha Guurtida hortiisa, wuxuuna Golaha Wakiiladu adeegsan karaa qareemo madax-bannaan oo arrintaas eedaynta ka kaalmeeya.
3. Waxa u fadhiisanaya xukunka eedayntaas Golaha Guurtida oo uu Guddoomiye ka yahay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare oo dhagaysanaya dacwadda ay soo oogayaan Guddida ay igmadeen Golaha Wakiiladu, iyadoo Madaxweynuhu ama Madaxweyne-ku-xigeenku isaguna yeelanayo qareemo gaar ah oo difaaca. Golaha Guurtidu wuxuu ku ansixin karaa

eedayntaas cod 2/3 (saddex meelood laba meelood) oo tirada guud ee Golaha ah.

4. Haddii Xeer-ilaaliyaha guud ku soo eedeeyo Wasiir ama Wasiir-ku-xigeen dembi ka mid ah dambiyada ku sheegan faqradda koowaad ee qodobkan, waxaa warbixinta eedda uu Xeer-ilaaliyaha Guud u gudbin doonaa Madaxweynaha. Haddii Madaxweynuhu ku qanco warbixinta waxa uu Wasiirka ama Wasiir-ku-xigeenka ka xayuubin doonaa dhowrsannaanta. Haddii uu ku qanci waayo Madaxweynuhu warbixinta Xeer-ilaaliyaha Guud, wuxuu amrayaa inuu Xeer-ilaaliyaha Guud la noqdo dacwadiisa.
5. Waxaa eedda la xidhiidha Wasiirada qaadi doonta Maxkamadda Sare ee Caddaaladda (High Court of Justice), Maxkamadaas oo ka kooban Guddoomiyaha Maxkamadda Sare; afar garsoore oo ka tirsan Maxkamadda Sare iyo afar xubnood oo ka tirsan Golayaasha Baarlamaanka oo Gole waliba soo doorto laba xubnood.

# QAYBTA AFARAAD

## XUBINTA 1AAD
## WAAXDA GARSOORKA

### QODOBKA 97AAD

1. Waxa Qaranku yeelanayaa Waax Garsoor, oo hawsheedu tahay u gar-naqa ka dhaxeeya Dawladda iyo dadka; iyo dadka dhexdooda.
2. Waaxda Garsoorku waxay hawlaheeda u fulinaysaa si Dastuurka waafaqsan, iyada oo ka madax-bannaan waaxyaha kale ee Qaranka.

### QODOBKA 98AAD

1. Garsoorku waxa uu awood gaar ah u leeyahay:-

b. Inuu fasiro micnaha xeerarka ka soo baxa Golayaasha dastuuriga ah iyo Xeerarka degdegga ah iyada oo la raacayo Dastuurka.

t. Inuu ka garsooro khilaafka ka dhex abuurma laamaha Dawladda oo dhinac ah iyo xubno ka tirsan dadweynaha oo dhinac ah ama dadweynaha dhexdooda.

j. Inuu ka taliyo muran kasta oo la xidhiidha waafaqsanaanta Dastuurka

2. Ma bannaana in garsooruhu qabto shaqo kale inta uu hayo xilka Garsoorka.
3. Daryeelka ku habboon garsoorayaasha xeer baa nidaaminaya.

## QODOBKA 99AAD
## DHISMAHA GARSOORKA

1. Hay'adaha Garsoorku waxay ka kooban yihiin Maxkamadaha iyo Xeer-ilaalinta.
2. Garsoorayaasha Maxkamadaha iyo Xeer-ilaaliyaashoodu waxay u madax-bannaan yihiin hawshooda garsoor iyaga oo raacaya xeerka oo keliya.

## QODOBKA 100AAD
## MAXKAMADAHA

Maxkamadaha Jamhuuriyadda Somaliland waxay ka kooban yihiin:-

1. Maxkamadda Sare;
2. Maxkamadaha Racfaanka ee Gobollada;
3. Maxkamadaha Gobollada;
4. Maxkamadaha Degmooyinka; iyo
5. Maxkamadaha Ciidamada Qaranka.

## QODOBKA 101AAD
## MAXKAMADDA SARE

Maxkamadda Sare waa hay'adda ugu sarraysa Garsoorka; isla markaana waxay tahay Maxkamadda Dastuurka. Tirada garsoorayaashu waa inaanay ka yaraan Guddoomiyaha iyo afar garsoore; waxaana nidaaminaya xeer gaar ah.

## QODOBKA 102AAD
## MAXKAMADAHA HOOSE

Magacaabidda garsoorayaasha iyo habka shaqada maxkamadaha hoose (maxkamadaha racfaanka ee gobollada, maxkamadaha gobollada iyo degmooyinka), waxaa nidaaminaya xeer gaar ah.

## QODOBKA 103AAD
## XEER-ILAALINTA

Xeer-ilaalinta Guud ee Qaranku waxay ka kooban tahay Xeer-ilaaliyaha Guud iyo ku-xigeennadiisa.

## QODOBKA 104AAD
## MAXKAMADAHA CIIDAMADA IYO XEER-ILAALINTOODA

1. Maxkamadaha ciidamadu waxay gaar u yihiin dhegaysiga dembiyada ciqaabta ee lagu oogo xubnaha ciidamada Qaranka xaaladaha nabadda iyo dagaalka.
2. Maxkamadaha ciidamada iyo Xeer-ilaalintooda waxa nidaaminaya xeer gaar ah.

## QODOBKA 105AAD
## MAGACAABIDDA GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA SARE & GARSOORAYAASHA MAXKAMADDA SARE

1. Madaxweynuhu, isaga oo la tashanaya Guddida Cadaaladda, waxa uu magacaabayaa Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo garsoorayaasha Maxkamadda Sare, iyada oo la tixgelinayo:- heerka waxbarasho, waayo-aragnimo xirfadeed iyo suubanaan akhlaaqeed. Magacaabidda Guddoomiyaha Maxkamadda Sare waxa ansixinaya Golayaasha (Wakiilada iyo Guurtida) oo fadhi wada jir ah yeesha muddo aan ka badnayn saddex (3) bilood marka laga bilaabo taariikhda magacawga.
   Waxa Ku-xigeenka Guddoomiyaha noqon doonaa garsooraha dhinaca darajada ugu sarreeya garsoorayaasha ka tirsan Maxkamadda Sare (**Seniority**).

2. Ma bannaana in loo magacaabo xilka Guddoomiyaha Maxkamadda Sare qof aan buuxin shuruudaha hoos ku sheegan:

b. Waa in uu yahay muwaadin ka tirsan Jamhuuriyadda Somaliland

t. Waa in uu haystaa shahaado jaamacadeed oo barasho sharciga ah oo la aqoonsan yahay.

j. Waa in uu leeyahay waayo-aragnimo xirfadeed oo aan ka yarayn isugeyn toban sano; kuna soo shaqeeyey garsoore ama/iyo xeer-ilaaliye ama/iyo qareen ama/iyo macallin jaamacad ka bara sharciga.

x. Waa in uu siyaasadda ka madax bannaan yahay.

3. Madaxweynuhu xilka wuu ka qaadi karaa Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, isaga oo u baahan oggolaanshaha Golaha Wakiilada & Golaha Guurtida.

### QODOBKA 106AAD
### XIDHIIDHKA HAY'ADAHA GARSOORKA IYO WASAARADDA CADAALADDA

1. Wasaaradda Cadaaladdu waxay u xil-saaran tahay fulinta go'aanada maamul ee ka soo baxa Guddida Cadaaladda.
2. Wada-shaqaynta Wasaaradda Cadaaladda iyo Hay'adaha Garsoorka waxa qeexaya xeer.

# QAYBTA SHANAAD
## QODOBO KALA DUWAN
## XUBINTA 1AAD

### QODOBKA 107AAD
### GUDDIDA CADAALADDA

1. Gudidda Cadaaladdu waa hay'adda hoggaamisa maamulka Garsoorka, waxayna ka kooban tahay:

   ❖ Guddoomiyaha Maxkamadda Sare
   
   Guddoomiye

- ❖ Labada Garsoore ee ku xiga dhinaca darajada Guddoomiyaha Maxkamadda Sare Xubno
- ❖ Xeer-ilaaliyaha Guud Xubin
- ❖ Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda Xubin
- ❖ Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Xubin
- ❖ Laba xubnood oo Golaha Wakiiladu labadii sannadoodba hal mar ka soo doorto dadweynaha kana kala tirsan aqoon yahanada & ganacsatada; iyo
- ❖ Laba xubnood oo Golaha Guurtidu labadii sannadoodba ka soo doorto dadweynaha hal mar, kana kala tirsan dhaqan-yaqaanada iyo culimada Diinta.

2. Waxa fadhiga Guddidu ku ansixi karaa marka ay joogaan toddoba (7) xubnood.

3. Marka Guddoomiyaha Maxkamadda Sare gudan kari waayo guddoominta Guddida, sababo caafimaad, fasax ama shaqo ka tegid darteed, waxa si ku-meel-gaadh ah guddoomiyaha Guddida noqon doona garsooraha ka tirsan Maxkamadda Sare ee Guddida xubinta ka ah, dhinaca darajadana ku xiga Guddoomiyaha. Waxa xoghayn u ah Guddida Cadaaladda Kaaliyaha Sare ee Maxkamadda Sare.

## QODOBKA 108AAD
## HAWSHA GUDDIDA CADAALADDA

1. Guddida Cadaaladdu waxay u xil-saaran tahay: shaqo-siinta, xil-ka-qaadista, dallacaadda, hoos-u-dhigidda, bedelaadda iyo anshax-marinta garsoorayaasha maxkamadaha hoose (maxkamadaha racfaanka, gobollada iyo degmooyinka) iyo Ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud. Shaqaalaha kale ee ka shaqeeya Garsoorka waxay hoos imanayaan xeerarka shaqaalaha Dawladda.

2. Lama xidhi karo garsoore ama Ku-xigeen Xeer-ilaaliye Guud haddii aanay Guddida Cadaaladdu oggolaanin, hase yeeshee looma baahna oggolaanshaha Guddida

haddii garsooraha ama Ku-xigeena Xeer-ilaaliyaha Guud la qabto isaga oo faraha kula jira dembi ciqaabtiisa ugu yari ay tahay (3) saddex sannadood oo xadhig ah.

3. Xeer-ilaaliyaha Guud ayaa Guddida ka hor oogaya eedda ka xayuubinta dhawrsanaanta, anshax-marinta garsoorayaasha iyo Ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud.

## XUBINTA 2AAD

### QODOBKA 109AAD

### QAAB-DHISMEEDKA DALKA

1. Dalka Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu ka kooban yahay gobollo; gobol kastaana waxa uu u sii qaybsamaa degmooyin.
2. Dhismaha gobollada iyo degmooyinka, xuduudahooda iyo darajooyinkooda xeer baa tilmaamaya.
3. Wax-ka-beddelka tirada gobollada iyo degmooyinka ama xuduudahooda, iyada oo sababaysan waxa soo jeedinaya Golaha Xukuumadda, waxaana oggolaanaya Golaha Wakiilada iyo Golaha Guurtida.

### QODOBKA 110AAD

### MAAMULKA GOBOLLADA IYO DEGMOOYINKA

1. Maamulka gobollada iyo degmooyinku waa qayb ka mid ah Maamulka Xukuumadda Jamhuuriyadda Somaliland.
2. Xidhiidhka Xukuumadda-dhexe ee gobollada iyo degmooyinka waxa caddaynaya xeer gaar ah.

### QODOBKA 111AAD

### GOLAYAASHA GOBOLLADA IYO DEGMOOYINKA

1. Gobollada iyo degmooyinka dalku waxay yeelanayaan Golayaal sharci-dejineed oo ku kooban xeer hoosaadyo (Bye-laws) aan ka hor imanayn xeerarka dalka u dejisan iyo kuwa fulineed.

2. Tirada gole kasta oo gobol ama degmo shuruudaha laga doonayo xubinta gole gobol/degmo iyo nidaamka doorashada xeer ayaa tilmaamaya.
3. Guddoomiyaha degmadu, isagoo la tashaday wax garadka tuulada, waxa uu soo jeedinayaa guddida maamul ee tuullo, waxana ansixinaya Golaha Sharci dejinta ee degmada.
4. Golayaasha gobollada & degmooyinka waa in ay noqdaan kuwa awood u leh qorshaynta dhaqaalahooda iyo arrimahooda bulshada.
5. Guddoomiyaha gobolka waxa soo magacaabaya Xukuumadda, waxaana uu uga wakiil yahay Xukuumadda-dhexe gobolka iyo degmooyinka hoos yimaada.
6. Guddoomiyaha gobolku waa xidhiidhiyaha Xukuumadda-dhexe iyo degmooyinka gobolka, isagoo hoos imanaya Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
7. Muddada xilka golayaasha gobollada iyo degmooyinka waa shan sano (5).
8. b) Gole gobol ama degmo waa la kala diri karaa isagoon muddadiisa dhammaysan.
   t) Xaaladda ay ku iman karto iyo qaabka loo kala dirayo xeer ayaa tilmaamaya.

9. Xoghayaha gobolka ama degmada iyo madaxda waaxyaha ama laamaha Wasaaradaha ayaa xilka sii fulinaya iyagoo raacaya shuruucdoodii hore inta laga soo dooranayo gole cusub.

10. Golayaasha gobollada iyo degmooyinku waxay yeelanayaan xeer-hoosaadyadooda oo midaysan waxana gacan ka siinaysa Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

**QODOBKA 112AAD**
**BAAHINTA AWOODDA MAAMULKA**

1. Maamulka adeegyada bulsho sida caafimaadka, waxbarashada ilaa heer dugsi hoose-dhexe, xannaanada xoolaha, nabadgelyada gudaha, biyaha, nalka, isgaadhsiinta iwm, waxa xilkoodu saaran yahay maamulada gobollada iyo degmooyinka hadba heerka ay hanan karaan.

2. Kala-xadaynta awoodda maamul iyo cashuuraha ee Dawladda-dhexe iyo gobollada/degmooyinka, xeerka xidhiidhka Dawladda-dhexe iyo gobollada/degmooyinka ayaa caddeynaya.
3. Kala-xadaynta ku tilmaaman faqradda labaad ee qodobkan, waa in ay noqoto mid suurta-gelisa isku filnaansho gobollada iyo degmooyinku ka gaadhaan dhinacyada adeegyada bulsho.

## XUBINTA 3AAD
## HAY'ADAHA DAWLADDA

### QODOBKA 113AAD

### HAY'ADAHA DAWLADDA EE GAARKA AH

Hay'adaha Dawladda ee Qaranku waa:-

1. Xeer-ilaaliyaha Guud
2. Baanka Dhexe
3. Hay'adda Shaqaalaha Dawladda
4. Hanti-dhawrka Guud

Haddii loo baahdo hay'ado kale waa la dhisi karaa si xeerka waafaqsan.

### QODOBKA 114AAD
### MAGACAABISTA IYO XIL-KA-QAADISTA MADAXDA HAY'ADAHA

1. Magacaabista Xeer-ilaaliyaha Guud, Guddoomiyaha Baanka-dhexe, Guddoomiyaha & Guddida Hay'adda Shaqaalaha Dawladda iyo Hantidhawraha Guud, waxa soo jeedinaya Guddoomiyaha Golaha Xukuumadda; waxaana oggolaanaya Golaha Wakiilada ka hor intaan xilka loo dhaarin.
2. Waxaa xilka ka qaadi kara madaxda qodobkan ku sheegan Madaxweynaha oo keliya.
3. Mas'uuliyiinta Qaranka ee Dastuurku waajibiyay in la ansixiyo, si ku-meel gaadh ah xilka uma hayn karaan muddo ka badan saddex bilood.

## XUBINTA 4AAD
## GUDDIDA CULIMADA

### QODOBKA 115AAD
### WAAJIBAADKA GUDDIDA

Guddida Culimadu waa guddi madax-bannaan oo u xilsaaran:-

1. In ay si rasmi ah uga bixiyaan caddayn:-

b. Khilaafka Diiniga ah ee abuurma

t. Wixii la isku qabto in uu Shareecada khilaafsan yahay iyo in kale, ama iyaga ula muuqda in uu Shareecada khilaafsan yahay.

Guddidu waxay caddayntooda u gudbinayaan xafiiska codsiga caddayntu uga yimid ama Maxkamadda Dastuurka wixii iyaga uga muuqda.

2. Inay sameeyaan cilmi-baadhis nooc kasta ha ahaadee iyagoo ka eegaya dhinaca Diinta, gaar ahaan horumarka cilmiga sayniska iyo Diinta. Inay eegaan, hubiyaana, kutubta laga turjumo Shareecadda, gaar ahaan kwua maxkamaduhu u cuskadaan xukunkooda (ka hor intaan sharci ahaan loo ansixin), iyo kuwa gelaya manhajyada waxbarashada ee ku saabsan dhaqan-aqooneedka Diiniga ah.

### QODOBKA 116AAD
### TIRADA GUDDIDA IYO MUDDADA XILKA

Guddida Culimadu waxay ka kooban yihiin kow iyo toban (11) xubnood; muddada xilkuna waa shan sanno (5); xubintii mutaysatana dib baa loo soo magacaabi karaa.

### QODOBKA 117AAD
### SHURUUDAHA XUBNAHA

Xubnaha Guddida Culimadu waa in ay yeeshaan shuruudaha hoos ku qoran:-

1. Inuu yahay muwaadin, maskax ahaan iyo jidh ahaanba u gudan kara xilkiisa.
2. Inaanay da'diisu ka yaraan afartan sano (40).
3. Inuu yahay nin lagu yaqaan ALLAH-KA-CABSI iyo akhlaaq wanaag.
4. Inaanu hore ugu dhicin xukun ciqaabeed oo maxkamad horteed kaga caddaaday shantii sano ee ugu dambaysay.
5. Inuu leeyahay aqoon heer jaamacadeed ah amaba wax u dhigma oo dhinaca Diinta ah.
6. Markuu xilka Guddida qabto inuu ku sifoobo dhexdhexaadnimo dhinacyada siyaasadda iyo aragtida Diineed.

## QODOBKA 118AAD
## WAXYAABAHA KA REEBBAN XUBNAHA

Xubnaha Guddida Culimada waxa ka reebban:-

1. Inay ku tilmaanaadaan xisbi siyaasadeed ama urur gaar ah oo Diineed.
2. In ay qabtaan xil kale oo Qaran inta ay xilka Guddida hayaan.

## QODOBKA 119AAD
## MAGACAABIDDA XUBNAHA GUDDIDA CULIMADA

1. Xubnaha Guddida Culimada waxa soo magacaabaya guddi laga soo cayimo Golaha Xukuumadda iyo Golaha Guurtida oo is-tiro le'eg; waxaana oggolaanaya Golaha Guurtida.
2. Guddida Culimadu iyagaa iska dhex-dooranaya Guddoomiye iyo Guddoomiye ku-xigeen.

## QODOBKA 120AAD
## BANNAANAANSHAHA XUBINNIMADA GUDDIDA CULIMADA

Xubinnimada Guddida Culimada waxay ku bannaanaan kartaa:

1. Haddii uu istiqaalad dhiibo ama uu geeriyoodo.
2. Haddii ay burto shuruud ka mid ah shuruudihii xubinnimada
3. Haddii uu xukun ciqaabeed oo kama dambays ahi ku dhaco.

**QODOBKA 121AAD**
**MUSHAHARADA IYO GUNNADA**

Mushaharka iyo gunnada xubnaha Guddida Culimada xeer baa nidaaminaya.

**QODOBKA 122AAD**
**XEERARKA HAY'ADAHA**

Hay'ad kasta oo ka mid ah hay'adaha Dawladda ee gaarka ah waxa ay yeelanaysaa xeer u gaar ah oo qeexaya qaab-dhismeedkeeda, waajibaadkeeda iyo dhawrsanaanta madaxdooda.

## XUBINTA 5AAD

**QODOBKA 123AAD**
**MABAADI'DA CIIDANKA QARANKA**

1. Ciidanka Qaranku wuxuu u xil-saaran yahay ilaalinta iyo difaaca madax-bannaanida dalka; waxa intaa u dheer marka loo baahdo hawlaha xilliga xukunka degdegga ah ee waafaqsan Dastuurka.
2. Ciidanka Qaranku waxa uu had iyo jeer u hoggaansamayaa oo tixgelinayaa Dastuurka iyo xeerarka dalka.
3. Dhismaha Ciidanka Qaranku wuxuu ka koobnaanayaa dhammaan deegaannada Somaliland.
4. Qofka loo magacaabayo Wasiirka Gaashaandhigga waa in uu ahaadaa muwaadin madani ah (**Civilian**).
5. Qaab-dhismeedka ciidanka Qaranka xeer baa nidaaminaya.

**QODOBKA 124AAD**
**CIIDAMADA BOOLIISKA IYO ASLUUBTA**

1. Ciidanka Booliisku waxa uu u xilsaaran yahay ilaalinta nabadgelyada iyo dhaqan-gelinta xeerarka; qaab-dhismeedkooda iyo waajibaadkoodana xeer ayaa qeexaya.
2. Ciidanka Asluubtu waxa uu u xilsaaran yahay haynta iyo toosinta akhlaaqda maxaabiista; qaab-dhismeedkooda iyo waajibaadkoodana xeer ayaa nidaaminaya.

**QODOBKA 125AAD**
**DIYAARINTA XEERKA AFTIDA IYO MAGACAABIDDA GUDDIDA QABAN-QAABINTA AFTIDA**

Si ay u suurta gasho qaban-qaabinta Aftidu, waxa waajib ah in la soo saaro Xeerka Aftida iyada oo laga shiidaal-qaadanayo tilmaamaha Dastuurku asteeyey; waxaana la magacaabayaa guddida qaban-qaabinta Aftida si waafaqsan Dastuurka.

**QODOBKA 126AAD**
**WAX-KA-BEDDELKA IYO KAABIDDA DASTUURKA**

1. Soo jeedinta wax ka beddelka iyo/ama kaabidda Dastuurka waxa leh:-

b. Madaxweynaha, ka dib marka uu la tashado Golaha Xukuumadda.

t. 1/3 (saddex-meelood meel) tirada guud ee Golaha Wakiilada.

j. 1/3 (Saddex meelood meel) tirada guud ee Golaha Guurtida.

2. Waxa waajib ah in soo jeedinta wax ka beddelka iyo/ama kaabidda Dastuurku ay sababaysan tahay, saxeexan tahayna.
3. Wax-ka-beddelka iyo/ama kaabidda Dastuurka waxa ay Golaha Wakiilada iyo Golaha Guurtidu ka doodayaan laba bilood ka dib marka uu Golaha

Wakiiladu aqlabiyadda tiradiisa ku go'aansado in loo baahan yahay wax-ka-beddelka iyo/ama kaabidda.

4. Wax-ka-beddelka qodob ama qodobo ka mid ah Dastuurka iyo/ama kaabiddiisu waxa ay ku ansaxayaan kadib marka uu 2/3 (saddex meelood, laba) tirada guud ee Golaha Wakiilada iyo Golaha Guurtidu uu mid waliba goonidiisa isugu raaco.
5. Haddii Golaha Wakiiladu uu aqlabiyadda tiradiisa isugu raaci waayo in loo baahan yahay in wax laga beddelo ama wax lagu kordhiyo ama labadaba; ama haddii labada Gole midkood ku ansixin waayo wax-ka-beddelka iyo/ama kaabidda 2/3 (saddex meelood, laba) tirada guud ee xubnihiisa, soo jeedintaas dib looma soo celinayo 12 (laba iyo toban) bilood oo dambe.

## QODOBKA 127AAD
## XUDUUDDA WAX-KA-BEDDELKA IYO KAABIDDA DASTUURKA

Ma bannaana in soo jeedinta wax-ka-beddelka iyo/ama kaabidda Dastuurku ay xambaarsanaato nuxur ka soo horjeeda:-

b. Mabaadi'da Shareecada Islaamka.
t. Midnimada dalka (**Israacsanaanta dhul-ahaaneed**).
j. Mabaadi'da talo-wadaagga iyo hannaanka xisbiyada badan.
x. Xuquuqda asaasiga ah iyo xorriyaadka qofka.

## QODOBKA 128AAD
## SALDHIGGA IYO SARRAYNTA DASTUURKA

1. Dastuurka waxa saldhig u ah mabaadi'da Islaamka.
2. Dastuurka ayaa ugu sarreeya xeerarka dalka, xeer kasta oo aan isaga waafaqsanaynina, waxa uu noqonayaa waxba kama-jiraan.

## QODOBKA 129AAD
## DHAARTA DASTUURIGA AH

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare oo isla markaana ah Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuuriga ah ayaa dhaarinaya cid kasta oo Dastuurku ku waajibiyey dhaartan Dastuuriga ah, ka hor inta aanu xilkiisa bilaabin; sidoo kale waxaa isagana dhaarinaya Madaxweynaha.

“WAXAAN ILAAHAY UGU DHAARTAY IN AAN U NOQONAYO DAACAD DIINTA ISLAAMKA, DALKAYGA SOMALILAND, DADKIISANA KU MAAMULAYO SINNAAN IYO CADDAALAD INTA AAN XILKA HAYO”.

## QODOBKA 130AAD
## DHAQAN GELINTA DASTUURKA IYO QODDOBADA KALA GUURKA

1. Dhaqan-gelinta Dastuurku waxay ka bilaabmaysaa marka afti loo qaado, natiijada aftiduna soo baxdo, waxana si ku meel gaadha loogu dhaqmi karaa muddo saddex sannadood gudahood ah oo ka bilaabmaysa taariikhdii uu oggolaaday shirweynihii 3aad ee Beelaha Somaliland
2. Haddii qabashada aftidu suuroobi waydo muddada loo xaddiday, waxa muddada ku meel gaadh ahaan loogu dhaqmayo Dastuurka kolba kordhin kara Baarlamaanka (Guurtida iyo Wakiilada).
3. Haddii ay xubin ka mid ah Golaha Guurtida ama Golaha Wakiilada ay ku timaado xaalad ka mid ah xaaladaha ku tilmaaman qodobka 50aad waxaa soo buuxinaysa beeshii uu ka tirsanaa inta laga gaadhayo nidaamka axsaabta ee doorashada.
4. Haddii ay ku timaado asbaabaha ku tilmaaman qodobka 86aad Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha, ama midkood, inta laga gaadhayo nidaamka axsaabta ee doorashada tooska ah, labada Gole (Wakiilada iyo Guurtida) ayaa si wada jira muddo 45 maalmood gudahood ah ku dooranaya Madaxweyne iyo Madaxweyne-ku-xigeen ama midkood, iyadoo xilka jagada bannaanaatay muddada doorashada ka horaysa uu hayn doono Guddoomiyaha Golaha Guurtidu.

5. Dalka Jamhuuriyadda Somaliland waxa lagaga dhaqmayaa xeerarkii hore loogaga dhaqmi jiray ee aan ka hor imanayn shareecada Islaamka, xuquuqda qofka iyo xorriyaadka asaasiga ah, inta laga soo saarayo xeerar waafaqsan Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; isla markaa waa in la diyaariyaa xeerarka Dastuurka waafaqsan, waxaana lagu keenayaa xeer walba ugu yaraan muddada uu u xaddido Golaha Wakiiladu.
6. Haddii gobollada iyo degmooyinku ay muddo saddex bilood ah gudahood ku dhisan waayaan golayaal, Xukuumadda-dhexe waxay ku meel gaadh ahaan u magacaabaysaa maamulo gobolo iyo degmooyin iyadoo kala tashanaysa xubnaha Golaha Wakiilada iyo Golaha Guurtida ee metala gobolladaas iyo degmooyinka iyo weliba guurtida degaamadaas.

<u>Magacyada Guddiga isku-duba-ridka Dastuurka</u>:

1. Sh. Cabdilaahi Sh. Cali Jawhar Guddoomiye

**<u>Magacyada Gudidiga isku duba ridka Dastuurka</u>**

| | | |
|---|---|---|
| 1) | Sh. Cabdilaahi Sh.Cali Jawhar | Gudoomiye |
| 2) | Maxamed Axmed Cabdule | Gudoomiye ku xigeen |
| 3) | C/qaadir X.Ismaacil Jirde | Xog haye |
| 4) | Sh. Maxamuud Suufi Muxumed | Xubin |
| 5) | Maxamed siciid maxamed (Gees) | Xubin |
| 6) | Sh. Cali Sh.Cabdi Guuleed | Xubin |
| 7) | Faysal Xaaji ismaciil (Qareen) | Xubin |
| 8) | Cismaan Xusseen khayre (Garsoore) | Xubin |
| 9) | Prof.Faarax Cabdilaahi Fariid | Xubin |
| 10) | Prof.Maxamuud Nuur Caalin | Xubin |
| 11) | Xasan Cabdi Xabad | Xubin |
| 12) | Axmed Maxamed Jaamac | Xubin |
| 13) | Yuusuf Aadan Xuseen | Xubin |
| 14) | Cismaan Cali Bille | Xubin |
| 15) | Maxamed Jaamac Faarax | Xubin |

**Guddida Dib u Habynta iyo Dib u Eegida Dastuurka**

**Golaha Guurtida:**

| | | |
|---|---|---|
| 1) | Mudane Siciid Jaamac Cali | Gudoomiye |
| 2) | Mudane Axmed Nuur Aw Cali | Xog hayn |
| 3) | Mudane C/laahi Sh. Xasan | Xubin |
| 4) | Mudane Siciid C/laahi Yaasir | ‘’ |
| 5) | Mudane Cali X. Cabdi Ducaale | ‘’ |
| 6) | Mudane C/raxmaan Axmed Areye | ‘’ |
| 7) | Mudane Maxamed Ciise Faarax | ‘’ |
| 8) | Mudane Yusuf C/laahi Cawaale | ‘’ |
| 9) | Mudane Muxumed Aw Axmed | ‘’ |
| 10) | Mudane Axamed Gaaxnuug Jaam | ‘’ |
| 11) | Mudane Maxamed Cismaan Guuleed | ‘’ |

**GOLAHA WAKIILADA:**

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Mud. Xasan Axmed Ducaale | Guddoomiye |
| 2. | Mud. Cali Maxamed Cumar | Xoghaye |
| 3. | Mud. C/raxmaan Xuseen Cabdi | Xubin |
| 4. | Mud. Maxamed Xuseen Dhamac | ‘’ |
| 5. | Mud. Cabdi Daahir Camuud | ‘’ |
| 6. | Mud. C/laahi Ibraahim Kaarshe | ‘’ |
| 7. | Mud. Axmed C/laahi Cali | ‘’ |
| 8. | Mud. Faysal X. Jaamac | ‘’ |
| 9. | Mud. Maxamed Aadan Gabalos | ‘’ |
| 10. | Mud. Cumar Nuur Aare | ‘’ |
| 11. | Mud. Yaasiin Faarax Ismaaciil | ‘’ |
| 12. | Mud. Yaasiin Maxamuud Xiir | ‘’ |
| 13. | Mud. Cali Obsiiye Diiriye | ‘’ |

GUDDIDA SIXIDDA, HUBINTA IYO SOO-SAARIDDA NUQULKAN DASTUURKA

1) Mudane Axmed Maxamed Aadan Guddoomiye (Wakiilada)________________________

2) Mudane Axmed Nuur Aw Cali Xoghaye (Guurtida)________________________

3) Mudane C/laahi Sh. Xasan Xubin ______________________

4) Maxamed Xuseen Cismaan Xoghayaha G/Wkiilada ________________________

Sh. Ibraahim Sh. Yuusuf Sh. Madar Axmed Maxamed Aadan

Guddoomiyaha Golaha Guurtida Guddoomiyaha Golaha wakiilada

______________________ ____________________

XOGHAYNTA GUDDIDA DASTUURKA

1) Faisa Maxamed Axmed
2) C/risaaq Siciid Ayaanle